Diiwaanka Intifaaca Qoysaska Kadeedan Ee

Louisville Iyo Agagaarkeeda

Fariin Ka timi Duqa Magaalada Jerry E. Abramson…… 3
Ilaalinta Deg-Dega ah iyo Ashkatada Dambiyada……..…4
24-saa Taleefoono Aad Mushkilaha Kala Xidhiidhi Karto……6
V.I.N.E…….……7
Cadaadiska Caruurta Yar-Yar……..…9
Xanaanada Caruurta……12
Hanuunita/La Talinta Caruurta……..15
Wadaadada Deegaanka……...….17
Hanuunin……...21
Intifaaca Dhaqanka Iyo Luqadaha…….24
Cadaadiska Haasaawaha/Shukaansiga……...……27
Furitaanka/Caawinta Hooyooyinka Kalida Ah…….….29
Waxbarashada/Tacliinta……..30
Shaqada……..33
Dhexgalka Qoysaska Caddadiska Gurigu Haysto…….35
Caawimo Dhaqaale……...…37
Cuntada…….40
Intifaaca Khaniisiinta iyo Khaniisadaha …….. 43
Caafimaadka…….45
Sharci Ka Caawinta……..55
Goobta Deriska/Jiiraanka……59
Kufsiga……62
Dadka Waayeelka Ah……63
Illo Dhaqaale……..67
Maandooriyaha Sida Xun Loo Isticmaalo…….……..68

Ogaysiis dadka websaytkan isticmaala: Riix magaca qaybta aad doonto ee dusha ku qoran. Hadii aad doonaysid inaad ku soo noqotid halkii hore, riix meesha ay ku qoran tahay "Return to Table of Contents"

Fariin Ka Timi Duqa Magaalada Jerry E. Abramson

Xafiiska dumarka ee Louisville iyo agagaarkeeda wuxuu ku faraxsanyahay inuu soo bandhigo daabacaada 5aad ee intifaacan qiimaha leh, “Diiwaanka Intifaaca Qosaska Kadeedan Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda”. Diiwaankan waa la cusboonaysiiyay waxaana lagu kordhiayay intifaacyo badan oo la socda magaaladeena kobcaysa ama koraysa. Diiwaankani wuxuu kuu fududaynayaa inaad hesho macluumaadyo badan oo aad u baahantahay. Intifaacyadan faraha badan ee u banaan bulshada waxay kalooy ka hadlayaan sida aynu ugu hagar bixi lahayn bulshadeena, si aynu u noqono bulsho xoog leh caawisana inteeda liidata, inakoo u shaqaynayna si aan daal ku jirin si aynu uga takhalusno cudurkan.

Waxaanu u mahad celinaynaa dhamaan dadka macluumaadkan noo soo uruuriyay iyo intiina u saamaxday in dadka macluumaadkan u baahani ay si fudud u helaan. Aad baanu ugu faraxsanahay inaanu ka mid noqono horu marinta bulshada Louisville iyo Agagaarkeeeda iyo in la ilaaliyo nolosha inta dhibaatadu ka haysato cadaadiska guriga iyo kadeedka, iyo si loo joojiyo cadaadiska iyo kadeedka ka jira deegaankeena.

Balanqaadkayaga in guri walba iyo shaqo waliba noqoto mid aan cadaadis iyo kadeed ka jirin waxaad ka arki kartaa meelo badan oo ka mid ah xafiisyada dawlada oo ay ka mid yihiin, Wassarada Cadaalada, Laamaha Booliiska ee Louisville iyo Agagaarkeeda, iyo sida joogtada ah ee aynu u horjoogsanay cadaadisyada.

Xafiiska Dumarka Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda

Xafiiska Dumarka Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda (OFW) waa qayb ka mid ah ilaalinta sharciga bulshada ee u adeega bini aadmiga ee Louisville iyo Agagaarkeeda. Xafiisku wuxuu isticmaalaa sharciyo u saamaxaya inay nolosha dumarka Louisville iyo Agagaarkeeda ku nool ay kor u qaadaan.

Hadafka OFW wuu balaadhan yahay waxaana ka mid ah sida arimaha jidhka iyo maskaxda dumarka khuseeya, siyaasada, sharciyada, iyo ammaanka sida qoysaska cadaadiska iyo kadeedku haysto. Xafiiska OFW wuxuu tilmaamaa waxyaabaha xun-xun, wuxuu kaloo sameeyaa xidhiidh wacan, wuxuuna u guntaday inuu hagaajiyo nolosha dumarka Louisville iyo Agagaarkeeda.

Tina Lentz, Agaasimaha
Xafiiska Dumarka
Adeega Bini Aadmiga Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda
Taleefon: 574-5360
Fax: 574-6888
Email: ofw@louisvilleky.gov
Website**:** **www.louisvilleky.gov//ofw**

Diiwaanka waxaad heli kartaa shebekada internetka ee cinwaankeedu yahay www.louisvilleky.gov/ofw

Ammarka Ilaalinta Deg-Dega Ah Iyo Dacwadaha

Hadii aad doonaysid inaad xaraysid dacwada **Illinta Ammarka Deg-Dega Ah** waa inaad ahaataa:
-Qof reerka ka mida.
-Xaaskii/ninkii hore ama labada qof ee aan is qabin laakiin wada nool mid ka mid ah, ama labada qof ee hore u wada noolaa ee caruuri ka dhaxayso.
-18 jir ama ka wayn.
-Inaad wadato qofka dambiilaha ah cinwaankiisa guriga, iyo hadii ay suurta gal tahay qofka dhalashadiisa iyo sooshal sekuuritigiisa.
-Hadii aad doonaysid inaad dacwada Ilaalinta dalbadto, tag golaha cadaalada inta u dhaxaysa 8:00 subaxnimo ilaa 12:30 duhurnimo, Isniinta ilaa Jimcaha, waxaad tagi kartaa goobta cadaadiska guriga ee ku taala dabaqa koowaad qolka lambarkiisu yahay 1150, taleefoonku waa (595-0853).
-Waxaad kaloo tagi kartaa xafiiska karaaniga maxkamada qoyska, taleefoonkiisuna waa (595-3025) ee ku taala dabaqa labaad ee goobta cadaalada 700 W. Jefferson St.
-Mar kasta oo kale oo aad u baahato, tag qaybta maxkamada taraafikada iyo dambiyada, taleefookeeduna waa (595-3064). Waad qaadan kartaa EPO 24-saac todobada maalmood ee wiigaba.

Waxa laguu ogolaan karaa mid walba ama qaar ka mid ah markaad Illaalinta deg-dega ah dalbatid:

1. Ammar in dambiiluhu joojiyo inuu dib kuugu hanjabao.
2. Ammara in dambiiluhu aanu dib kuula soo xidhiidhi Karin.
3. Ammara in dambiiluhu guriga ka baxo.
4. Ammar in caruurta adiga lagu siiyo.
5. Ammar in dambiiluhu hub iibsan Karin

Waxa lagu waydiin doonaa inaad saxeexdo (EPO), waayo waxa weeye qoralka cadaynta ah ee qaadiga la hor keenay. Qoraalkaasi wuxuu qeexayaa dacwadaada, markaa aad bay muhiim u tahay inaad runta ka sheegtaa. Mar walba ku dadaal inaad akhrido waraaqaha intaanad saxeexin.Dhagaysi ayaa la qaban doonaa mudo 14 maalmood gudahood ah.

Hadii aad doonaysid inaad xarayso **Dacwad Dambiile** , tag xafiiska dhexdhexaadinta maraykanka ee ku yaala goobta cadaalada. Waa inaad 18 jir ama ka wayn ahaataa. Hadii aad 18 jir ka yartahay, waa in qof wayni kula socdaa, ama wac xafiiska lambarkiisu yahay 595-3106. Xafiiskani wuxuu furan yahay 24-saac todobada maalmood ee wiiga. Waa inaad haysataa aqoonsi sawirkaagu ku yaalo iyo qofka dambiga kaa galay magciisa oo sedexan iyo ciwaankiisa. Dadka kuu markhaatiyada ah iyo arimahaagu wa inay diyaar kuu sii ahaadaan intaanad xafiiskan tagin. Waad ashkatayn kartaa qof kasta oo dhibaato kuu gaysta xataa hadii aydaan qofka waxba isu ahayn.

Qof xafiiska ka socda yaa kaa caawin doona arimahaaga , waxaanu samayn doonaa mid ka mid ah siyaabahan hoos ku qoran:

1) Wuxuu dacwada u gudbin doonaa qof dhex-dhexaadiye ah. Waxaad heli doontaa warqad odhanaysa dacwad dhagaysi ayaa dhici doona mudo 7-10 maalmood gudahood ah. Hadii dhex-dhexaadiyaha aad ku qanci waydo waxaad qaadiga waydiisan kartaa inuu dacwadaada ku noqdo oo dib u eego.
2) Wuxuu ku amri karaa ama uu soo saari karaa ammar in dambiiluhu maxkamada tago. Waxa weeye amr ogaysiis ah oo la ogysiinayo in dambiiluhu maxkamada iska soo xaadiriyo.
3) Wuxuu ammar ku bixin karaa in dambiilaha la soo xidho. Dambiilaha waa laxidhayaa waxaana la gaynayaa jeel, ka dibna waxaa la keenayaa maxkamada.
4) Wuxuu diiddi karaa qaadigu dacwadaada,. Hadii qaadigu diido dacwadaada, waxaad helidoontaa warqad mudo 7-10 maalmood gudahood ah. Boostada ayaa warqad laguugu soo diri doonaa hadii ,maxkamada lagaaga baahdo.

Hadii aad xaraysay Illalinta deg-dega ah iyo dacwada dambiilaha labadaba, waa inaad maxkamada tagtaa laba goor oo kala duwan. Tegitaanka maxkamada qoysku kaama cafinayso inaad maxkamada dambiyada iska soo xaadiriso. Looma baahna ama lagaagama baahna inaad qareen wadato ama aad lacag bixiso markaad dacwadan xaraynayso.

Khadadka Dhibaatooyinka 24-saac

Gargaarka Deg-dega Ah	**911**
Cadaadiska Caruurta Iyo Dadka Waawayn	1-800-752-6200
U Adeega Ilaalinta Dadka Waawayn	595-4803
Khadka Caawinta Golaha Nabada Ee Caritas	541-3333 ama 1-800-451-3637
(Turjubaan baad helaysaa 24-saac ka hor hadii aad sii dalbato)	
Golaha Qoysaska Iyo Dumarka Kadeedku Haysto	581-7222 581-7274 (TDD)
(Luqad kasta waa la helayaa)	
U Adeega Ilaalinta Caruurta	595-4550
Khadka Wargelinta Caruurta Cadaadisku Haysto	1-800-752-6200 1-800-372-2972 (TTY)
Caruurta Dambiyada Laga Galay	575-2465
(Turjubaan waa laguu helayaa)	
Golaha Macluumaadka Dhibatooyinka Ba'an	589-4313 ama 1-800-221-0446 589-4259 (TTD)
(Luqad kasta waa la helayaa)	
Khadka Cadaadiska Guriga	1-800-799-SAFE (7233) 1-800-787-3224 (TTY)
(Luqad kasta waa la helayaa)	
Khadka Caruurta La Waayay Iyo Kuwa La Fara Xumeeyay	1-800-325-3535
(Luqad kasta waa la helayaa)	
Khadka Caawinta Waalidiinta	1-800432-9251

V.I.N.E
1-800-511-1670

VINE waxay u taagan tahay Victim Information and Notifiation Everyday, oo micnaheedu yahay Wargelinta Dadka Cadiban Ama Dambiyada Laga Galo Maalin Walba. Waa adeeg dawladu bixiso oo ka jira Louisville iyo Agagaarkeeda, kaasoo u ogolaanaya qof waliba inuu war ka helo qof uu garanayo oo jeel kaga jiraa degmada Jefferson hadii uu jiro, taleefon isagoo qofku isticmaalaya. Waxa kale oo ay qofka u samaxaysaa inuu ogaado arima ha qofka uu garanayo ee jeelka kaga jira degmada Jefferson iyo hadii wax is bedelo ahi ku soo kordheen dhawaanahan.

OGOW: VINE ma bixin karto war ama macluumaad ku saabsan caruurta da'doodu yar yar tahay eek u xidhan jeelasha degmada Jefferson. VINE waxay war siin kartaa oo kaliya dadka caruurta dawladu u xil saartay.

Markaad is diiwaan gelisid, VINE waxay ku ogaysiin doontaa wixii iska bedelay qofka xidhan iyo halka arimihiisu marayaan. Hadiiaad is qorto iyo hadii kaleba VINE waxay ku siin kartaa macluumaadkan:

- Qofka Xidhan Xaaladiisa.
- Meesha qofku ku xidhan yahay.
- Qofka xidhani maalinta uu maxkamada u leeyahay, sacada iyo meesha uu ku leeyahay maxkamada.
- Qofka xidhan aqoonsigiisa ama lambarka xadhigiisa

Hadii aad ka soo wacayso taleefonada lacagta lagu guro, fadlan sug inaad qof la hadasho. Hadii aad ka soo hadlayso taleefoonada touch-tone ka loo yaqaan, fadlan dhagayso macluumaadka. Waxa lagu waydiin doonaa qofka xidhan lambarkiisa ama magaciisa. Hadii aad garan waydo qofka xidhan xadhig lambarkiisa, waxaa lagu waydiin doonaa inaad xarf-xaraf u yeedhisid magaca qofka xidhan. Taleefoonkaad ka sheegaysaa, ka dib VINE way ku afgaranaysaa. Kumbuyuutar ayaa dhagaysanayaa dhawaaqaaga, ka dib hubinaya xuruufta aad yeedhisay. Aad bay muhiim u tahay inaad si degan oo la fahmi karo aad u hadashid, dhagaysatidna macluumaadka VINE ku siinayso.

Tilmaamo Ku Caawinaya

1. Waxaad xaraf-xaraf u yeedhin doontaa magacaaga ama qofka xidhan magaciisa.
2. VINE way dhawaaaqi doonta ka hor xaraf walba. Dhawaaqaasi ma heera, markaa fadlan si degan u dhagayso.
3. Hadii aad doonaysid inaad is diiwaan gelisid, waa inaad VINE siisaa laba taleefoon oo lagaa heli karo. Sistamka ama nidaamku wuu is garaacayaa ilaa inta uu ka helayo afar lambar oo aad dooratay markaad is diiwaan gelinaysay. Fadlan xasuusnow afarta lambar ee sirta ah ee aad dooratay markaad is diiwaan gelinaysay.

4. Waxaad lagu siin doonaa ikhtiyaarka inaad taleefon isku qorto oo qudha iyo inaad cinwaankaaga dhiibtid, ka dibna warqad laguu soo diro hadii talefoonkaagu bixi waayo.
5. La soco qofka xidhan lambarkiisa. Lambarka qofka xidhani isma bedelo si kasta oo arinkiisu isu bedelo iyo hadii qofka dhowr goor oo kala duwan la xidhaba.
6. Mar hadii laguu sheego in qofkii xidhnaa meeshii laga bedelay, uma baahnid hadan inaad is qorto si aad arinkiisa iyo wakhtiga la soo daynayo ula socotid. Magacaagu wuu ku jirayaa VINE ilaa iyo inta qofka laga soo daynayo.

Lambarada muhiimka ah inaad taleefonka ku haysatid:
Qofka xidhan lambarkiisa_____
Qofka xidhan aqoonsigiisa_____
Afarta lambar ee diiwaan gelinta_____

Cadaadinta Caruurta

U adeega Illalinta Caruurta (CPS)

595-4550 (Luqado aan badanayn baa la hayaa hadii aad dalbato)
Lambarkan soo wac oo war gali xaaladaha caruuraha ay dhibaatadu haysato iyo kuwa la inkiray. Taleefoonada habeenkii iyo wiikendhiyada la soo diro waxa ka jawaaba xafiiska dhibaatooyinka ba'an. Caruuraha lagu xadgudbay arimahooda waxa ka shaqeeya qof ka socda xafiiska gargaarka, ama qof ka socda xafiiska gargaarka iyo booliis. Dacwooyinka ku saabsan kaysaska furan ee CPS waxa loo gudbiyaa qofka u xil saaran CPS da qoyskaa.

Dadka Sharci Yaqaanada Ah oo Maxkamadu U Xil Saarto (CASA)

514 W. Liberty, #139, 40202
595-4911
www.casajc.org

waxay bixisaa sharci yaqaano bilaash ah oo la shaqeeya caruuraha la cadaadiyo iyo kuwa la inkiro sharciyaqaanadaas maxkamada la shaqaynaya. Waxaa qasab ah inay maxkamadu ku qalaqaaliso inay ku caawiyaan.

Qaybta Caruuraha Dambiyada laga Galay

436 S. 7th Street; 40203
574-2465; saacadaha dambe waxaad wacdaa 574-7111, ama khadka degdega ah, 911 waxay baadhaysaa caruuraha la fara xumeeyay iyo kuwa la cadaadiyo ee Louisville iyo agagaarkeeda. Waxay kaloo baadhaa caruuraha la waayay ama la la'a yahay. Turjubaano waad heli kartaa hadii aad dalbato.

Xafiiska Adeegyada Iyo La Talinta Ee Drawbridge

313 W Madison Street
La Grange, KY 40031
225-9199
www.drawbridgecounseling.com

Xafiiskani wuxuu bixiyaa oo caruurta siiyaa talooyin, xanaano iyo waxyaabo kaloo badan. Waxay ku takhasuseen caruuraha la fara xumeeyo, mushkilada nafsiyada iyo waxyaabaha lama filaanka ah ee qofka ku dhaca. Adeegyadan waxaa kharashkiisa bixiya caymiska qaar ka mid ahna waxa bixiya kaadhka caafimaadka ee caruurta. Meelo caruuraha lagu xanaaneeyo (Kuwa afka Ingiiriga lagaga hadlo iyo kuwa Isbaanishka laga hadlaba),tababaro fara badan oo kala duduwan iyo qoysas doonaya iyo caruuro korsadaan oo waalid ay caruurta u noqdaan. Adeegan waxa lagu heli karaa luqadaha Ingiriisiga, Isbaanishka iyo Fransiiska.

Ururka U Adeega Caruuraha Lagu Xad Gudbo

1500 Popular Level Road, Qolaka 2aad, 40217
636-3670

www.echolou.org
Xafiiskan waxay shaqadiisu tahay inuu ka hor tago ku xad gudubka iyo fara xumaynta caruurta. Adeegyaday bixiyaan waxaa ka mid ah inay u qudbadeeyaan oo ay taageeraan caruuraha la dhibaateeyay markay maxkamada kaga markhaati furayaan dadkii xumeeyay, taageerada waalidiinta, maktabad intifaac, iyo inay caruurta la sii joogaan inta waalidiintu ay maxkamada ku mashquulsan yihiin.

Qoyska iyo Caruurta Ugu Horayn

560 South 4th Street, 40202
584-8505

www.famchild.org/children_first.htm
Waxay siisaa adeegyo caruuraha la faraxumeeyay ama sida xun loo cadaadiyay iyo qoysaskooda (inta badan waxa xidhiidhka u soo gudbiya booliiska, dhakhtarada, iyo haya'da gargaarka). Waxay bixisaa adeeg 24-saac ah.

Goobta Qoyska

1800 Neville Drive, 40216
636-2801

www.familyplaceky.org (Websiteku isbaanishna wuu ku qoran yahay)
Xafiiskani wuxuu talooyin iyo adeeg siiyaa guruubyada iyo shakhsiyaadka ka badbaaday qoysaska caruurahooda cadaadisku gaadhay. Wuxuu kaloo adeegyo siiyaa dadka dhibaataysan. Booqashooyin talo ah ayaa kaloo la bixiyaa. Turjubaan waad helaysaa.

Goobta Deriska ama Jiiraanka

Fiiri qaybta "Goobta Deriska" meelaha ay ku taalo.
www.neighborhoodpl.org
Waxay bixisaa adeegyo ay ugu deeqayso qoysaska dhibaataysa. Adeegyo dhexdhexaadin ah ayaa goobo fara laga bixiyaa.

Ka Hortaga Cadaadinta Caruurta Ee Kentucky

489 E Main St, Dabaqa Sadexaad
Lexington, KY 40507
1-800-Children

www.pcaky.org

Waxay bixisaa mashaariic lagaga hor tagayo cadaadiska caruurta yar yar, kalaasyo, Kooxo wax caawiya, qalab taxadar, iyo maktabad intifaac ah. Khadka Caawinta waalidiintu wuxuu siiyaa macluumaad qoysaska iyo caruuraha.

Mashruuca Ku Meel Gaadhka Ah Ee Todobada Degmo

914 E. Broadway, 40204
689-1100
www.sevencounties.org/specialized_child_and_family.htm
Waxay bixisaa adeegyo fara badan oo dadka maskaxiyan u caawiya kuwaas oo ay ku caawiso dadka ka soo doogay ama ka badbaaday cadaadis ka haystay qofkay nolosha wada qaybsanayeen, cadaadis galmo, iyo cadaadis caruureed. Adeegyadan waxa ka mid ah dad ku takhasusay arimahan, guruubyo ku xeel dheer arimahan iyo dhakhaatiir, kuwaasoo ku xeel dheer caawinta , la talinta iyo tacliinta. Khidmado aan badnayn baad bixinaysaa, caymiskana waa la aqbalyaa. Turjubaana waad helaysaa.

Xanaanada Caruurta

Naadiga Wiilasha Iyo Gabdhaha Ee Kentucky

216 West Chestnut Street; 40202
625-1170
Waxuu bixiyaa waxyaabo badan oo ah cayaaraha dhalinyaradu ciyaarto, oo ay ka mid yihiin ciyaaraha fudud ,dhalinyarada waxyaabaha goonida ah xiiseeya, kooxo ciyaareed iyo talooyin ay la taliyaan dhalinyarada.

Guriga Dib U Dajinta Ee Cabbage Patch

1413 S. 6th Street; 40208
634-0811
www.cabbagepatch.org
Waa xanaano caruureed oo sharciyaysan, waxaana lagu xanaaneeyaa caruurta da'doodu u dhaxayso Laba sano iyo badh ilaa lix sano, khidmad aan aad u badnayn. Waxa kale oo ay bixisaa mashruucyo iyo ciyaaro ay dhalinyarada da'doodu udhaxayso 6-17 ay ku maararoobaan, todobada maalmood ee wiiga Kowda duhurnimo ilaa Lixda galabnimo. Wakhtiyada kulaylaha waa la kordhiyaa mashruucyada.

Goobta Ikhtiyaarka Waxbarashada Caruurta

204 E. Jacob Street; 40202
585-9856
Saacadaha: 6:00 Subaxnimo Ilaa 8:30 Galabnimo
Waxay bixisaa Xanaano caruureed iyo xanaanada caruurta aan wali iskuulada bilaabin ee da'doodu u dhaxayso Lix wiig ilaa Lix sanadood. Maalintii oo dhan ama qayb maalinta ka mida ah labduba way banaanyihiin.

Isku Dubaridka Xanaanada Caruurta Ee Bulshada (4-C)

1215 S. Third Street; 40202
636-1358
www.4cforkids.org (Websiteku wuxuu kaloo ku qoran yahay luqada Isbaanishka)
Isku Dubaridka xanaanada Caruurta Ee Bulshada (4-C) waa rayid, aan qasdigeedu ahayn inay lacag faa'iido laakiin uu yahay inay nolosha dadka bedesho, in ay dadka u baahani heli kraan adeegan, iyo xanaano iyo ilaalin caruurta aan wali iskuulada bilaabin ee ku nool gobolka Kentucky. 4-C waa qayb gobolka ka mid ah oo bixisa tababar iyo macluumaad ku saabsan caruurta da'da yar yar. Turjubaano luqada Isbaanishka ah ayaa jira qofkii dalbada, qoraalada qaarkoodna waxay ku daabacan yihiin luqada Isbaanishka.

Hay'ada Caawimada Ee U Adeega Caruurta

1-800-421-1903
http://cfc.ky.gov/help/child_care.org

Waa xanaano caruureed ku caawisa dadka caawimada aan gurigooda dhexdiisa aan ahayn u baahan. Waxay kaloo bixisaa liiska xanaanooyinka banaan ee agagaarka ku yaal.

Goobta Qoyska
1800 Neville Drive, 40216
636-2801

www.familyplaceky.org (Websiteku isbaanishna wuu ku qoran yahay)
Wuxuu bixiyaa xanaano degdeg ah oo uu siiyo caruuraha da'doodu u dhaxayso 0-6 sano ee qoysaskooda dhibaatada xuni haysato ama ay dhibaato xoog leh oo caruuraha lagu xaqiri karaa ku soo fool leedahay. Waxay kaloo bixisaa caawimooyin dheeraad ah.

Hoyga Qofka Aan Dambiga Lahayn
1100 East Marker Street; 40206
596-1000
www.homeoftheinnocents.org
Wuxuu xafiiskani caruurta dhibaataysan siiyaa hoy ku meel gaardh ah ama meel qofku seexdo oo ku meel gaadh ah. Kalkaalisooyin ayaa wakhti ku meel gaadh ah caawinaya hadii ilmuhu uu u qalmo in la siiyo caawimadan sariirna ka banaantahay meesha. Waa inuu ilmuhu lahaadaa kaadh caafimaad ama caymis.

Xarunta Xanaanada Caruurta Ee Iroquois
4100 Lentz Ave.; 40215
368-3488
Saacadaha: 6:00 Subaxnimo – 5:30 Galabnimo
Wuxuu xafiiskani bixiyaa xanaano caruureed oo aad u heer saraysa iyo kobcinta caruurta da'doodu u dhaxayso 6 weeg ilaa 11 sano.

Xarunta Kobcinta Caruurta Ee Saretha's West End
2331 W. Madison St.; 40211
Saacadaha: 6:00 Subaxnimo – 6:00 Galabnimo
Wacxuu xafiiskani bixi xanaano caruureed oo aad u heer saraysa iyo kobcinta caruurta da'doodu u dhaxayso 18 bilood ilaa 12 sano.Luqado badan baa loo heli karaa qofka.

U Adeega Dadka Aragoodu Liito Intaanay da'dii Iskuulka Gaadhin
1299 Garvin Palce; 40203
464-3207

www.vips.org
Xafiiskani wuxuu caawiyaa caruuraha maqalkooda iyo aragoodu liito laga bilaabo kuwa markaa dhashay ilaa kuwa aan gaadhin da'dii iskuulka lagu galayey, kuwaasoo ay ku soo booqdaan guryahooda, xarumo lagu xanaaneeyo iyo gargaar waalidiinta la siiyo, iyo inay ku cawiyaan joornaal soo baxa labadaii wiigba mar.

Xarunta Xanaanaynta Caruurta Darxumaysan Ee
Wayside Christian Mission.

225 S. Shelby St.; 40202
584-3711
Xafiiskani wuxuu bixiyaa xanaano caruureed oo bilaash ah taasoo uu ku caawiyo qoysaska dhibaatada iyo darxumadu haysato, sidoo kale wuxuu xafiisku bixiyaa gaadiid bilaash ah oo ku gaynaya hudheelada ay dadka ku hayaan. Turjubaan waa laguu keenayaa hadii aad dalbato.

Hoyga Wesley

803 E. Washington St., 40206
583-8317
www.wesleyhouseky.org
Saacadaha: 6:00 Subaxnimo Ilaa 11:30 Subaxnimo
Xafiiskani wuxuu bixiyaa xanaano maalintii caruurta da'doodu tahay 6 wiig ilaa 12 sano lagu xanaaneeyo iskuulka ka hor iyo iskuulka kadib. Waxaa muhiimada la siiyaa dadka degan Phoenix Hill iyo kuwa degan Butchertown, in kastoo meelaha kaleba adeega la siiyo.

Xanaanada Caruurta Ee YMCA

545 South Second St. 40202
587-9622
www.ymcalouisville.org/programs_childcare.shtml
Wuxuu xafiiskani bixi xanaano caruureed oo uu siiyo caruurta da'doodu u dhaxayso 6 wiig ilaa 14 sano. Xanaano caruureed iskuulka markay ka yimaadaan ka dib kuwaasoo wakhtiyada kulaylaha saacadahooda la kordhiyo. Khidmada ama lacagta waa lagaa caawinayaa. Luqado badan baa loo heli karaa qofka dalbada.

Taageerada iyo Taakulaynta Caruurta

Adeega Dhakhtarka Maskaxda Ee Caruurta

Daarta Legal Artska
200 S. Seventh Street; Qolka 500; 40202
589-8070
Waxay caawimo deg deg ah siisaa qoysaska iyo caruuraha wakhtigu haysto, sida kuwa laga garanayo in wax u soo dhinmayaan. Waxay kaloo bixisaa caawimo wakhti gaaban ah oo ay ku caawiso qoysaskaa darxumaysna. Khadka luqadaha waxaad ka heli kartaa turjubaan luqadaada ku hadlaya.

Goobta Caruur Hagida Ee Bingham

200 E. Chestnut Street; 40202
852-6941
Wuxuu xafiiskani baadhaa qofka maskaxdiisa inuu qofku soo waalanayo iyo in kale, siiba caruurta yar yar ee wakhtigu ku adag yahay ama silcaya ka dibna waxay siiyaan xanaano marka uu qofku dhakhtarka ku jiro iyo marka uu qofku ka soo baxaba. Waa inaad balan sii dhigataa hadii aad xafiiskan doonayso inaad tagto.

Caruurta Ugu Horayn

560 South 4th Street, 40202
584-8505
www.famchild.org
Xafiiskani wuxuu bixiyaa dawooyin iyo adeegyo talooyin ah oo ay ku caawiyaan caruuraha la fara xumeeyay ama jidhdilka lagu sameeyay ee sida xun wax loo gaadhsiiyay iyo qoysaskooda. (waxaa xafiiskan kula taliya inay dadka caawiyaan booliiska, dhakhtarada, iyo hay'ada u adeega bulshada). Wuxuu Xafiiskani bixiyaa adeeg 24-saac ah ama habeen iyo maalinba.

Qaysaka Iyo Caruurta Ugu Horayn

2303 River Road; 40206
893-3900
www.famchild.org
Wuxuu xafiiskani siiyaa ashkhaasta iyo qoysaska adeegyo qarsoodi ah. Adeegyadaas oo ay ka mid yihiin qoysaska, talooyinka guurka iyo dadka nolosha wadaaga. Adeegyo khaas ah ayay siiyaan dadka gaboobay ama da'doodu wayntahay, qoysaska haysta caruuraha xanuunsanaya, iyo qoysaska ay soo gaadhay dhibaatooyinka cadaadiska guriga iyo fara xumaynta caruurta yar yar.

U Adeega Qoysaska iyo Caruurta Ee Lutheran

1864 Frankfort Ave.; 40206
899-5991
Waxay maskaxda u degijaa qoysaska iyo caruuraha dhibaataysan, khidmaduna ma badna.

U Adeega Goobta Amaanka Ee YMCA

2400 Crittenden Drive; 40217
635-5233
www.wmcalouisville.org/programs_youth.shtml
xafiiskani wuxuu Caawiyaa wiilasha iyo gabdhaha da'doodu u dhaxayso 12-17 sano . Caawimadani waxay abaartaa dhexdhexaadinta iskhilaafka iyo ama cadaadiska iyo xumaynta kale ee qoyska. Dad Luqado badan ku hadlaya ayaa laga helayaa xafiiskan.

Wasaaradaha Deegaanka

Wasaaradaha deegaanku waxay bixiyaan adeegyadan halkan ku qeexan: Caawimo dhaqaale oo mudo gaaban ah, Caawimo xaga dharka la xidho ah, caawimo raashinka ah, intifaac caafimaad, intifaacyo la siiyo qoysaska kala guurka ku jira, iyo ka hor hortaga dibjirnimada ama guri la'aanta ah. Adeegu wuu kala duduwan yahay wasaaradaha gudahooda. Wasaarad kastaba waxay u adeegtaa xaafad ama qayb Zip koodh gooni ah leh.

Wasaarada Deegaanka Ee Qaybta Bari

11700 main St; 40243
241-6141
Saacadaha 9:00 subaxnimo Ilaa 4:30 Galabnimo Isniin-Jimce.
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, waxoogaa raashin ah, kabadh dhar ah, barnaamij caafimaad, bilow wanaagsan oo caruurta yar yar ah (Lucbado iyo waxyaabo caruurtu ku ciyaarto).
Meelaha zip koodhkoodu yahay: 40222, 40223, 40242, 40243, 40245, 40059, 40018, iyo qaybo ka mid ah 40299.

Wasaarada Deegaanka Ee Bariga Louisville

417 E. Broadway; 40202
561-0722
Saacadaha: 10:30 Subaxnimo Ilaa 3:00 Galabnimo Isniin-Jimce.
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, waxoogaa raashin ah, iyo taageero dhar ah. Meelaha: Smoketown, Shelby Park, Butchertown, iyo Phoenix Hill.

Wasaarada Degaanka Ee Qaybta Fairdale

10616 West manslick Road; 40118
367-9519
Saacadaha 9:00 subaxnimo Ilaa 5:00 Galabnimo Isniinta, 9:30 Subaxnimo – 1:00 Duhurnimo, Arbacada iyo Jimcaha .
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, waxoogaa raashin ah, kabadh dhar ah, barnaamij caafimaad,
Meelaha zip koodhkoodu yahay: 40119, 40219, Galbeedka I-65.

Wasarada Midowga Fern Creek/Highview

7502 Tangelo Drive; 40228
239-7407
Saacadaha: 8:00 Subaxnimo Ilaa 5:00 Galabnimo Isniin-Jimce.

Adeegyada: Meel dadka waawayni maalintii ku kulmaan oo ku sheekaystaan, adeegyo caawinta qoysaska ah, Amaahin qalab caafimaad, iyo adeegyo la siiyo reeraha xiliga kala guurka ah ku jira. Adeegyadan kalena waxay furan yihiin saacadaha 10:00 Subaxnimo Ilaa 2:00 duhurnimo: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, waxoogaa raashin ah, kabadh dhar ah, Kaysaska oo reeraha laga caawiyo iyo kula talin meelaha qofka u fiican.

Goobta Qoyska

6104 Bardstown Road; 40299
762-0630
Saacadaha 10:00 Subaxnimo Ilaa 2:00 Galabnimo Isniin – Jimce.
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40228, 40203

Wasaarada Caawinta Ee Badhtamaha Louisville

425 S. Second Street; 40203
637-5202
Saacadaha: 9:00 Subaxnimo Ilaa 12:30 Duhurnimo Isniin – Jimce.
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, waxoogaa raashin ah, kabadh dhar ah, barnaamij caafimaad, iyo caawimo tigidh.
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40202, 40203, 40208

Wasaarada Bulshada Ee Highlands

1140 Cherokee Road; 40204
451-3626
Saacadaha: 9:00 Subaxnimo Ilaa 12:00 Duhurnimo Isniin – Jimce.
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, waxoogaa raashin ah, Koox u gargaarta hooyooyinka, Ka caawin shaqooyinka ah, Kabadh dhar ah (Soo wac hadaad macluumaad doonayso), Mashruuc kobcinta caruurta ah.
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40204, 40205

Wasaarada Qaybta Jeffersontown

10617 Taylorville Road; 40299
267-1055
Saacadaha: 10:00 Subaxnimo Ilaa 1:00 Duhurnimo Isniin – Jimce, Balanada iyo baahida deg dega ah. Waxoogaa raashin ah, Waxoogaa dhar ah oo or illaahay ah, Fara galinta u adeega biniaadmiga.
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40299, 40023

Wasaaradaha Isutaga Badhtamaha Koonfurta Louisville (MUSCL)

1207 Hart Avenue; 40213
363-9087
Saacadaha: 9:00 Subaxnimo Ilaa 2:00 Duhurnimo (Fadlan soo wac hadaad balan doonayso) Isniin – Jimce.
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, iyo barnaamij caafimaad,
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40213,40217, 40219 iyo 40229.

Wasaarada Agagaarka St. Matthews

201 Biltmore Rd; 40207
893-0205
Saacadaha: 9:00 Subaxnimo Ilaa 4:00 Duhurnimo Isniin – Jimce.
Adeegyada: Qoysaska xiliga kal guurka ku jira, adeegyo ku saabsan immigrationka, Mashruuc kobcinta caruurta, Waxoogaa raashina ah, Caawimo dharka iyo cuntada ah oo la siiyo dumarka uurka leh iyo caruurtooda.
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40207

Wasaarada Agagaarka Shiverly

1867 Farmsley Road; 40216
447-4330
Saacadaha: 9:00 Subaxnimo Ilaa 1:00 Duhurnimo Isniin – Jimce.
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, caawimo raashin oo deg deg ah, Caawimo caafimaad oo deg deg ah, kabadh dhar ah iyo mashuurc caafimaad.
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40216.

Wasaarada Booqashada Walaasha

2235 W. Market; 40212
775-5766
Saacadaha: Isniin, 10:30 Subaxnimo Ilaa 4:00 Duhurnimo. Talaado – Jimce 9:00 subaxnimo Ilaa 4:00 galabnimo
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, Gaadiidka dadka u baahan la siiyo, Raashin loo qaybiyo, Waxyaabaha nadaafada, saabaa ama qalabka guriga iyo dhar, iyo in la soo booqdo qoysaska iyo shakhsiyaadka baahan.

Wasaarada Bulshada Koonfurta Louisville

4803 Southside Drive; 40214
367-6445
Saacadaha: 9:00 Subaxnimo Ilaa 4:00 Duhurnimo Isniin – Jimce. (Balan oo qudha wixii ka dambeeya 1:00 Duhurniom).
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah (Balan oo qudha), Mashuurc caafimaad, Mashruuc dhalinyarada loogu tala galay, waxoogaa raashin ah,(Balan oo qudha), Turjubaan luqada Isbaanishka waa laguu helayaa hadii aad codsato.
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40208, 40209, 40214, 40215.

Wasaarda Isu keenida ee Koonfur Bari

6500 Six Mile Lane A; 40218
499-2059
Saacadaha: 10:00 Subaxnimo Ilaa 12:30 Duhurnimo Isniin – Jimce.

Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, waxoogaa raashin ah, Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40218, 40220

Wasaarada Bulshada Koonfur Galbeed

10936 Dixie Highway; 40272
935-0310
Saacadaha adeega: 1:30 Duhurnimo Ilaa 3:15 Duhurnimo. Goobta waxaa la furaa 8:30 Subaxnimo Ilaa 5:00 Galabnimo Isniin – Jimce.
Adeegyada: Raashin (1:30 ilaa 3:15 Isniin-Jimce), Adeeg dadka waawayn la siiyo, caawimo dhaqaale oo deg deg ah (1:30 Ilaa 3:15 Isniin, Arbaca iyo Jimce)
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40258, 40272 iyo qaybo ka mid ah 40177.

Wasaarada Isutaga Crescent Hill

150 S. State Street; 40206
893-0346
Saacadaha: 10:00 Subaxnimo Ilaa 4:00 Duhurnimo Isniin – Jimce.
Adeegyada: caawimo dhaqaale oo deg deg ah, waxoogaa raashin ah, adeeg ah car ma xanaanayn kartaa (Isnii, Arbaca iyo Jimce). Qof kaa caawinaya kaysaska gargaarka, dhaqdhaqaaqyo dadka waawayn iyo dhalinyarada loogu tala galay (Talaado iyo Khamiis)
Meelaha Zip koodhkoodu yahay: 40206.

Wasaarada Bulshada Galbeedka Louisville

3146 West Broadway; 40211
778-2815
Saacadaha: 9:00 Subaxnimo Ilaa 3:00 Duhurnimo (Balan oo qudha) Isniin – Khamiis.
Adeegyada: Caawimo dhaqaale oo deg deg ah, Ka caawin iyo kala talin kaysaska, mashruucyo caafimaad. Waxaad u baahantahay inaad balan samaysato hadaad adeegyadan u baahantahay. Turjubaan waa laguu helayaa hadii aad sii dalbato..
Meelaha xuddudkoodu yahay: Waqooyi: Broadway, Koonfur:Magaaladii hore, Galbeed: Ohio River, Bari: 7th Street.

Tageero Ama Caawimo

Dhakhtarka Baptiska Ee Bariga
Goobta Caafimaadka culuumta
4000 Kresge Way; 40207
896-7105
Khadka caawimada 24-saac 1-800-467-8183
www.baptisteast.com/030400.cfm

Waa qayb dhakhtarka Nafsiga ah oo ku taala Xerada dhakhtarka Baptiska ee Bariga. Dhakhtarkani wuxuu bixiyaa caawimo iyo talooyin uu siiyo shakhsiyaadka goonida ah, qoysaska, iyo xaasaska, caawimoyinkaas oo ay ka mid yihiin marka qofka dhakhtarka la dhigo iyo marka laga soo saaraba. Turjubaan waa loo helayaa qdadka dhakhtarka la dhigo.

Golaha Nabadgalyada ee Caritas
2020 Newburg Road.; 40205
Khadka caawimada 24-saac 451-1333 ama 1-800-451-3637
www.caritas.com

Waa dhakhtar madani ama barayfat ah oo daweeya cudurada nafsiga iyo kiimikada. Waa dhakhtar dadka la dhigo, mudo gaaban iyo ka dib marka qoku dhakhtarka ka baxaba mashruucyo lagu caawiyo ayaa jira. Waxay aad ugu xeel dheeryihii Caruurta aadka u da'da yar yar, kuwa meel dhexaadka ah iyo dadka waawaynba (oo ay ku jirto geriatrics). Dadka markay dhakhtarka ka baxaan way la taliyaan, caawimo iyo tacliina way siiyaan siduu qofku ubogsan lahaa. Qiyaas bilaash ah baad helaysaa. Waxa kale oo dhakhtarkani ka shaqeeyaa meelo badan oo Kentucky ka mid ah. Turjubaan waa laguu helayaa hadii aad codsato 24-saacadood ka hor.

Dhakhtarka Dhexe Ee Gobolka
10510 LaGrange Rd; 40223
245-7000
Waa dhakhtar dadwayne oo lagu daweeya cudurada maskaxda ku dhaca ama dadka maskaxda wax uga dhiman yihiin.

Adeegyada Deg Dega Ah Ee Nafsiga
Dhakhtarka Jaamacada Louisville
530 S. Jackson St.; 40202
562-3120

Wuxu dhakhtarkani bixiyaa adeegyo lagaga hortago ama lagu dhexgalo mushkilada ba'an 24-saac ama habeen iyo maalinba, todobada maalmood ee wiiga. Adeegyadan waxa ka mid ah qiyaasida qofka xanuunkiisu intuu leegyahay, talaalid ama dawayn iyo u jihayn meesha ugu haboon. Turjubaan luqadeed waa laguu helayaa hadii aad dalbato. Khad (Layn) laguugu turjumayaana wuu jiraa

Dumarka Iyo Caruurta Ugu Horayn

2303 River Road; 40206
893-3900
www.famchild.org
Waxay bixisaa adeegyo qarsoon iyo taageero ay ay siiyaan sakhsiyaadka iyo qoysaskooda. Adeegyada waxa ka mid aha qoyska, guurka, caawin shakhsiyaadka iyo guruubyada. Adeegyo khaas ah ayaa la siiyaa dadka waawayn, qoysaska caruurahoodu xanuunada ba'an qabaa, qoysaska caruurahooda cadadiska iyo faraxumayntu gaadhay, iyo qoysaska cadaadisku haysto.

Adeega Iyo Tababarka Qoysaska Ee Yuhuuda

3640 Dutchmans Lane 40205452-6341
www.jfvs.com
Isninaha, 9:00 subaxnimo Ilaa 9:00 habeenimo, Talaadooyinka iyo Khamiisaha 9:00 subaxnimo Ilaa 5:30 galabnimo, Jimcayaasha 9:00 Subaxnimo Ilaa 5:00 Galabnimo. Waxay bixiyaan adeegyo iyo taageero ay siiyaan shakhsiyaadka iyo qoysaska. waxay kaloo ku deeqaan tacliin iyo tababaro iyo imtixaanid, ku hanuunin dariiq wacan oo qofku ku shaqaysto iyo tababaro xaga shaqooyinka ku saabsan. Waxay kaloo bixisaa tacliinta nolosha qoyska anfacaysa, hagitaan waalidnimada ah, iyo ka hor tag wareerka iyo caruurta waalidiintoodu is fureen, iwm. Goobta baayacmushtarku waxay shakhsiyaadka ka caawisaa siday u bilaabi lahaayeen baayacmushtar uu qofku leeyahay. Mashruuc dajinta ku saabsan ayaa lagu caawiyaa dadka qaxoontiga ah. Khidmada waa lagaa caawinayaa. Adeegani wuu u furan yahay bulshada oo dhan

Kooxda U Gargaarka Dadka Reer Kentucky Ee Maskaxda Ka Jiran

9017 Taylorsville Road; 40299
499-9993
Waxay bixiyaan adeegyo u gargaara dadka maskaxda ka jiran, dadka isla hadla, dadka la faraxumeeya, dadka nolosha naca ee qoysaska shakhsiyaadka iyo guruubada ba leh. Medhicareka iyo medhikaydhkaba way aqbalaan, waxa kale oo ay sameeyaan qorshe fudud oo aad ku bixin kartid.

Goobta Deriska Ama Jiiraanka

Waxaad eegtaa qaybta "Goobta Deriska" hadii aad macluumaad dheeraad ah au baahantahay.
www.neighborhoodpl.org

Waxay bixisaa taageero iy talo caadi ah taasoo ay siiso dadka waxyeelada ba'ani soo gaadho. Waxay kaloo ku jihaysaa qofka halka uu caawimada ugu wanaagsan ka heli karo.

Adeega Todbada Degmo

101 W. Muhamed Ali Blvd.; 40202
589-1100 (Balanta oo qudha) 589-4313 (Macluumaadka)
www.sevencounties.org/specialized_child_and_family.htm

Waxay bixisaa caawimooyin caafimaadyada maskaxda ah oo kala duduwan, kuwaasoo ay siiso dad ka badbaaday cadaadiska qofka ay nolosha wadaagayeen ku hayay, cadaadiska galmada, iyo caruuraha la fara xumeeyay. Adeegyada waxa ka mid ah dad ku xeel dheer sida loola macaamilo ama loo taageero qoysaska, shakhsiyadaha iyo guruubyada wax yeeladu gaadhay iyo inay ku hanuuniyaan meelaha kale ee ay cawimo ka heli karaan. Khidmadu ma badna, caymiskana way aqbalayaan.

Adeegyada Khaaska Ah Ee Qoysaska Iyo Cruuraha

Broadway Office Plaza
914 E. Broadway; 40204
589-1100
Waxay qoysaska u fidisaa gargaaro badan oo kala duwan. Waxaanay xooga saartaa inay caawiso qoysaska maskaxda ama madaxa laga hayo, qoysaska cadaadiska iyo faraxumaynta loo gaystay iyo dadka daroogada iyo khamrigu dishooday.

Goobta Xaaladaha Ba'an iyo Macluumaadka

Waxay bixisaa talooyin ay taleefonka ka bixiso, macluumaad iyo iyadoo dadka ku hagaajisa meesha ugu wacan ee ay adeeg ka helayaan.
Khadadka gargaarka deg dega ah 24-saa 589-4313, 1-800-221-0446, 589-4259 (TDD)

Goobta lagu Daweeyo Dadka Daroogada iyo Khamrigu Dishooday Ee Jefferson (JADAC)

600 S. Preston; 40202
586-3951
Wuxuu xafiiskani bixiyaa barnaamijyo khuseeya dadka daroogada iyo khamriga sida xun u isticmaala. Adeegyada waxa ka mid ah qofka oo laga sifeeyo daoogada, iyo in la xanaaneeyo inta uu ka soo bogsanayo, adeeg wacan marka qofku dhakhtarka ka baxo ka dib, barnaamijyo tababar galbihii iyo iyo maalintii, barnaamijyo khuseeya dadka iyaga oo sarkhaansan gaadhiyaasha kaxeeya DUI, iyo barnaamijyada qoyska. Khidmadu ma badna, caymiskana way aqbalayaan.

Intifaaca Dhaqanka iyo Luqadaha

Goobta Bulskada America

201 E. Southland Blvd; 40214
366-7813
www.americancommunitycenter.org
Wuxuu xafiiskani caawiyaa dadka qaxoontiga ah, caawimooyin kaasoo ay ka mid yihii inay geeyaan iskuulo ama kalaasyo dadka luqadoodu aany Ingiriisiga ahayn la geeyo, waxbarashada dadka waawayn, barnaamijyo lagu caawiyo caruurtu marka ay iskuulka ka yimaadaan kadib, gargaar iyo tilmaamo shakhsiyaadka iyo qoysaskaba ah, banaamijyo caafimaad, iyo tilmaamid ama ku hagaajin dadka meelo badan oo ay taageero iyo caawimo kaga heli karaan luqado badan oo kala duwan.

Daka Doonta Ama Huudhiga S.O.S

5330 South Third Street, Qolka 200
Louisville, KY 40214
502-368-1491
http://www.bpsos.org/Louisville/Index.html
Wuxuu taageero iyo caawimo siiyaa dadka reer Vietnam ee qaxootiga ah. Waxay ka caawiyaan waraaqaha iyo hawlaha immigarayshinka waxaanay leeyihiin barnaamij ay ku caawiyaan dadka gaboobay. Waxa kale oo ay ku caawiyaan turjubaano iyo meelo luqadaha afka Ingiriiga laga barto.

Guriga Laatiinka (Casa Latina)

230 Woodbine Street; 40208
636-5461
Wuxuu adeeg siiyaa dumarka rer laatiin America ama laatiiniga iyo caruurtooda. Wuxuu ka caawiyaa xaga guryaha, la talinta, barnaamijyo khuseeya xaga cadaadinta guriga, arimaha imigarayshinka, iyo iskuulo dadka luqadoodu aanay Ingiriisiga ahayn loogu talo galay.

Xarumaha Katooliga Ee Deeqda u Fidiya Qaxoontiga iyo Dadka Soo Bara Kacay

2911 South Fourth Street; 40208
637-9787
www.catoliccharitieslouisville.org
Waxay bixisaa adeegyo sharciga ah iyo talooyin ay ugu tala galeen dadk adhaqaalahoodu liito ee qaxootiga ah, kuwasoo ay siiyaan raashin, dhar, iyo meelo ay u hoydaan qaxootiga cusubi. Waxa kale oo ay caawiyaan caruuraha dadka qaxootiga ahi wataan iyo

dadka waawayn oo ay luqada Ingiriisiga baraan. Iyana waxa kale oo ay ka caawiyaan siday dakaasi sharciga u heli lahaayeen iyo siday guryo ay degaan u heli lahaayeen.

Goobta Latino

102 S. Main Street
Shelbyville, KY 40065
502-647-3349
Waxay barnaamijo iyo talooyin siisaa dadka qaxootiga ah ee luqada Isbaanishka ku hadla ee degaankoodu yahay degmada Shelby iyo agagaarkeeda.

Isku Taga Hisbaaniga Iyo Laatiinooga

224 East Woodbine; 40203
589-8742
Waa goob macluumaadka siisaa bulshada Hisbaaniga. Waxay bixisaa adeegyada guud sida dharka, iyo caawimooyin la xidhiidha siday ay qoysaskaa qaxootiga ahi sharci iyo dawo u heli lahaayeen.

Adeega Qoysaska Ee Yuhuuda

3640 Dutchmans Lane; 40205
452-6341
www.jfvs.com
Waxay dadka ka caawisaa tacliin iyo imtixaanada, barnaamijyo dadka ku hagaajiya wadada toosan ee uu shaqo ku heli karo iyo tababaro. Waxay kaloo ka caawisaa waalidiinta inay wax barasho noloshooda dhista qaataan, isku buuqista, iyo caruuraha waalidkood is fureen. Barnaamijyo lagu dejinayo dadka qaxoontiga ah ee wadanka ku cusub. Khidmadu ma badna. Adeegani wuu ufuranyahay bulshada oo dhan. Luqada waa lagaa caawin karaa hadii aad dalbato turjubaan.

Wasaarada Qaxoontiga Ee Kentucky

969B Cherokee Rd.; 40204
479-9180
www.kyrm.org
Waxay u shaqaysaa inay ka caawiyaan dadka qaxoontiga ahi waxyaabaha lagama maarmaanka ah ee qofku u baahan yahay, sida guriga iyo alaabta guriga la dhigo, galitaanka iskuulka, caafimaadka iyo shaqooyinka. Waxa kale oo ay bixisaa kalaasyo loogu tala galay dadka luqadoodu aany Ingiriisiga ahayn.

Maktabada Bilaaashka Ah Ee Louisville- Qaybta Caalamiga Ah (Laanta Iroquois)

601 W. Woodlawn Ave.; 40215
574-1720

Maktabadan caalamiga ahi waxay xooga saarta iibsiga waxyaabaha luqadaha badan ku qoran, sida Qaamuusyada iyo buugaagta luqadaha kale ku qoran. Waxa kale oo ay bixisaa macluumaad ku saabsan maktabada iyo qoraalo kale oo luqado badan ku qoran.

Xafiiska Arimaha Caalamiga Ah

224 South Second Street; 40202
574-1432
www.loukymetro.org/oica.asp
Waxay bixisaa macluumaadyo iyo intifaacyo ku saabsan adeegyada iyo fursadaha Magaalada Louisville ay ka heli karaan bulshooyinka caalamiga ah iyo dadka oo dhamiba. Waxay bixisaa macluumaadyo ku saabsan dhakhtarada luqadaha badan ku hadla iyo turjubaanada agagaarkaas, iyo qoraalo ah macluumaadyo ku qoran luqado badan.

Xafiiska U adeega Maraykanka Ee Dhalashada iyo Sharciyaynta

Gene Snyder U.S. Courthouse and Customhouse, Qolka 390
601 West Broadway; 40202
583-6953
www.immigration.gov
Waxay bixisaa macluumaad, adeegyo iyo waraaqo ku saabsan qaxoontinimada iyo sharciyaynta. Waxa kale oo ay bixisaa macluumaad ku saabsan sida qofka shaqo loogu ogolaanayo iyo sida qofka inuu dhoof dhoofo loogu ogolaanayo. Waa inaad haysataa aqoonsi dawlada ama gobolku soo saaray si aad daarta u soo gashid. Waxaad iman kartaa Isniinta –Khamiista 7:30 Subaxnimo Ilaa 3:00 Duhurnimo.

Bulshooyinka Aduunka Ee Louisville

200 West Broadway, Qolka 607; 40202
585-9911
Waxay u shaqaysaa inay ku taageerto dadka wadanka soo galay ee qaxootiga ahi siday bulshada u dhex gali lahaayeen. Waxay soo saaraan wargees bishii mar soo baxa oo macluumaad siinaya dadka cusubi siday intifaac uga heli lahaayeen bulshooyin dhaqanadoodu kala duwan yihiin oo ku nool Louisville.

Wuxuu bixiyaa adeegyo ku meel gaadh ah oo ay ugu tala galeen hablaha yar-yar ee hooyooyinka ah iyo kuwa aan hooyooyinka ahaynba. Waxay goobtani bixisaa macluumaadyo ku saabsan xanaanooyinka caruurta ee agagaarkaas, iskuulada iyo dhakhtarada. Barnaamijyo goobta lagu qabanayo ayay bixisaa oo hablahaa yar-yar lagu barayo xirfado baraya siday isugu filnaan lahaayen, iyo siday waalidiin hagaagsan u noqon lahaayeen kuwa caruurta lihi. Waxa adeegan loo ogolyahay hablaha da'doodu udhaxayso 13-18 sano. Turjubaan waa laguu helayaa hadii aad dalbato.

Wada Lahaanshaha Guriga

333 Guthrie green, Qolka 404; 40202
585-5451
www.housingpartnershipinc.org
Banaamijka hanuuninta dhaqaale wuxuu bixiyaa is diiwaan galin qof ala qofkii doonaya inuu guri iibsado. Dadka barnaamijkan is qoraa waxay helaan falanqayn tafatiran oo ah xaalkooda dhaqaale iyo kiridhidkooda, waxana loo sii ogolaadaa in ay dad guryo iibsanaya noqdaan iyagoo isticmaalaya qorsheyaal badan oo ah siyaabaha guryaha lagu iibsado. Qof baa kula talinaya oo si aad u baabi'isid waxyaabaha naaquska ah ee kaa hor taagan inaad xaq u yeelato in lacag aad guri ku iibsato lagu amaahiyo. Sidoo kale dadku waxay ka qayb qaataan kalaasyo tacliin ah oo kuu sharaxa waji kasta ama marxalada kasta oo ah sida guryaha loo iibsado. Xafiiskani waxa kale oo uu taageeraa dadka lacagta guriga iska bixin kari waaya, iyo dadka ijaarka iska bin kari waaya, iyo hanuunin ah ka noqoshada guryaha.

Guriga Ruth

607 East St Catherine St.; 40203
587-5080
www.houseofruth.net
Wuxuu bixiyaa taageero guri oo ay siiyaan dadka qaba cudurka HIV/AIDS loo yaqaan iyo qoysaskooda. Waxay bixiyaan guryo ku meel gaadh ah iyo taageero ah sida ay u yeelan lahaayeen guryo iyo waxyaabaha nolol maalmeedka ah ee qofku u baahan yahay.

Hogaanka Guryaha Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda

420 S. 8th St.; 40203
574-3400
574-3828, TDD
www.hall.org
Waxay guyo jaban ku taakulaysaa dadka reer Louisville ee aan dhaqaalahoodu u saamaxayn inay suuqa xorta ah ka gataan guryo. Dadka u hoyda meelaha hudheelada ah ee dawladu bixiso iyo dadka kale ee dan yarta ahi waa inay soo wacaan si ay balan u samaystaan. Soo qaado shahaadadaada dhalashada, sooshal sikuyuuritigaaga, iyo hadii lagu furay ama aad wax furtay waxad u baahan tahay inaad waraaqihii furtiaanka aad soo qaadid.

Haya'ada Isku Filnaanshaha Bini Addmiga Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda

Goobta Dawlada Reer Magaalka
810 Barret Ave.; 40204
574-6421
http://wwwloukymetro.org/Department/HumanServices/selfsufficiency.asp

Kooxda U Jawaabista Dadka Bilaa Hoyga Ah

Waxay bixisaa adeeg maamul ah oo ilaa laba bilood ah oo ay arimaha qoysaska bilaa hoyga ah ku maamulaan, sidoo kale waxay intifaacyo siiyaan qoysaska ay dhibaatada ku tahay inay guryo soo helaan. Waxay ku xidhan tahay u qalanka guryaha ku meel gaadhka ah iyo hogaanka guyaha xaafada.

Camaliyada Isku Caawinta Qofka

Waxay maamul arimaha ah siisaa dadka ku nool guryaha dadwaynaha ama Sectio 8. Adeegyada maamulka arimaha waxa ka mid ah tababar isku-filnaanshaha ah, baaritaan xirfadaha lagama maarmaanka ah ee shaqada iyo noloshu ku dhisan tahay, dhaqaalaha, xirfadaha qoyska iyo waalidnimada, iyo sidaad guri u yeelan lahayd.

Horyaalka Reer Magaalka Louisville

1535 West Broadway; 40203
561-6830
585-2136 (TDD)
www.lul.org
Waxay bixisaa tabaro ah sida guri loo yeesho, hanuunin guri iyo adeegyo horumarin ah oo ay ku caawiso qoysaska dhaqaalahoodu hooseeyo iyo kuwa uu dhex-dhexaadka yahayba siday guryo u heli lahaayeen una maamulan lahaayeen.

Mashruuca Dumarka

806 East Chestnut Street; 40204
584-8090
Waxay bixisaa taageero iyo guryo ay siiso dumarka hoy la'antu haysato iyo dumarka u dhow inay hoy la'aani ku dhacdo ee caruuraha leh samaynayana shahaadadooda tacliinta sare.

Salvation Army

831 S. Brook St.; 40203
625-1170
Waxay meel siisaa raga kalida ah ee aan xaasaska lahayn, dumarka kalida ah, iyo qoysaska. Hadii ay shakhsiyaadka bilaa qoysaska ahi ay halkan deganaadaan in ka badan hal wiig ama usbuuc, waxa la waydiin doonaa inay bixiyaan $5.00 Habeen walba.

Bulshada St. Vincent de Paul

1015-C S. Preston St.; 40203
584-2480

Guryaha DePaul

Waa guryo ku meel gaadh ah oo la siiyo dumarka caruuraha wata ee hoy la'aantu hayso. Khidmada barnaamijku waxay ku xidhan tahay 30% dhaqaalaha qofka soo gala ah. Maamulo arimaha ah ayaad helayso.

Goobta Roberts

Waxay dumarka hoy la'aantu haysato siisaa guryo ah wakhti dheer oo ku meel gaadh ah. Dumarka halkan degayaa waa inay ahaadaan qaar aan isticmaalin daroogooyin iyo khamri, ariamhoodana waa loo maamulayaa.

Goobta Soo Doogista/Bogsashada Dumarka Ee St. Jude

Waxay bixisaa 30- sariirood oo ay ugu tala gashay dumarka ka soo doogaya ama ka soo bogsanaya isticmaalka Daaroogada iyo Khamriga

Adeegyada Ku Meel Gaadhka Ah Ee Loogu Tala Galay Qoysaska Hoy La'aantu Haysato

1700 Rowan; 40203
584-8046
Waxay bixisaa 12 guri oo ku meel gaadh ah oo ay siiso waalidiinta haysta caruurta da'doodu tahay ama ka yartahay 2 jir.

Iskaa Wax U Qabsada Maraykanka
933 Gross Ave.; 40217
636-0816

Ka Hor Taga In Qofka Guriga Debada Looga Tuuro
410 West Chestnut Street; 40202
568-1438
Waxay bixiyaan dhex-dhexaadin ah si looga wada hadlo in qofka ama madaxda guriga iska lihi aanay qofka guriga ijaarka ugu jira aanay dibada uga tuurin ama ka saarin guriga inta qofka xaalkiisu is bedelayo.

Hoyga Baahida Deg-Dega Ah Ee Qoyska
1321 South Preston
636-0916
Waxay bixisaa guryo deg-deg ah o ay siiso qoysaska hoy la'aantu hayso ama debedaha seexda ee aan haysan meel ay u hoydaan. Adeegyo raashin ah, maamul arimaha ah, caafimaad, shaqo ku hanuunin, iyo adeegyo loogu tala galay dadka daroogada isticmaala.

Guriga Xoriyada
1436 South Shelby Street #2; 40217
634-0082
Waa meel lagu daweeyo ama lagu xanaaneeyo dumarka uurka leh ee daroogada iyo khamriga isticmaala iyo dumarka caruuraha yar-yar haysta.

Guriga Maude Booth
1131 South 1st Street; 40203
582-0904
Waxay adeeg siisaa dumarka caruurta yar yar haysta ee daroogada iyo khamriga isticmaala. Waxay bixiyaan tacliin, hanuunin, waxa kale oo ay bixisaa maamulid kaysaska, tacliimo ku saabsan balwada iyo cudurka HIV/AIDS ka, gargaar ku saabsan waalidnimada iyo xirfadaha nolosha, adeegyada xanaanada caruurta iyo sii wadashada caafimaadka.

Goobta Kiristaanka Ee Wayside
808 Eeast Market St.; 40206
584-3711
www.waysidechristianmission.org
Waxay bixsaa guryo ku meel gaadh ah iyo kuwo ay bixiso marka ay baahi deg-deg ahi jirto, adeegyadaas oo ay siiso qoysaska iyo dumarada baahan. Maamul kaysaska ah ayaa la siiyaa qosaska iyo shakhsiyaadkaba.

Adeega Goobta Amaanka YMCA/Shelter House

2400 Crittenden Drive; 40217
635-5233
Waxay bixisaa meel la seexdo marka baahi deg-degi jirto, hanuunin iyo hogaamin caruurta ka soo baxsatay guryahoodii iyo kuwa bilaa guryaha ah ee da’doodu u dhaxayso 13-17 sano. Waxa kale oo ay bixisaa adeegyo ay ku hanuuniso in dhalinyaradu samayso qaraaro hagaagsan.

Taageerada Sharciga

Macluumaadka Maxkamada

Maxkamada Degmada	595-4428
Maxkamada Meegaarka	595-3064
Maxkamada Qoysaska	595-3025
Maxkamada Probaytka	595-4434
Maxmada Dacwooyinka yar-yar	595-4475

Goobta Dumarka iyo Caruurta

226 W. Breckenridge St.; 40203
Laga bilaabo November 15,2004 Cinwaankoodu wuxuu isu bedelayaa 927 E. 2nd St
581-7200
www.thecenteronline.org
Waxay dadka ka caawisaa kaysaska kiriminaalka ah iyo kuwa rayidka ah ilaa inta kaysku socdo oo ay qof ku daraan kala shaqeeyaa arimaha cadaalada si kastaba ha ahaadaane. Adeegani wuxuu u banaanyahay dadka la fara xumeeyay, iyo qoysaska ka badbaaday cadaadiska kaga yimi qofkay galmada wadaagayeen.

Qaybta Caawinta Caruurta

315 W. Muhamed Ali Blvd.; 40202
574-8300
574-8599 (waa hab codadka afka Ingiriisiga Iyo Isbaanishka ku shaqeeya)
Waxay bixisaa taageero, waxa kale oo ay bixisaa meelo adeegyo iyo inay ka uruuriso lacag aabaha caruurta dhalay, si ay u abuurto taagero lagu taageerayo dadka degan Louisville iyo Agagaarkeeda. Waxa kale oo ay ka caawisaa in aabaha laga soo uruuriyo lacagihii caruurta lagu biilin lahaa ee uu hore u bixin wayay.

Xafiiska Qareenka Ee Barwaaqo Sooranka Qaybta Cadaadiska Guriga

514 W. Liberty St.; 40202
595-2340
Waa koox ku takhasustay waxyaabo badan oo ah xaga maxkamadaha sida cadaadiska qoyska, iyo caruurta la fara xumeeyo, si ay u yareeyaan xanuunka soo gaadha dadka ka badbaday falalkaa. Sideed qof oo la shaqeeya qofka wax yeeladu soo gaadhay iyo laba qof oo la shaqeeya dadka ay dhibaatada cadaadinta gurigu soo gaadhay ayaa xafiiska jooga. Dad taba baran ayaa bixiya ka hortag, taageero, iyo macluumaad ay siiyaan qof walba oo ka soo badabaaday cadaadiska guriga ama caruurta la soo fara xumeeyay.

Goobta Cadadiska Guriga

Golaha Cadaalada Ee Degmada Jefferson, Dabaqa 1aad, qolka 1150
600 W. Jefferson Street; 40202
595-0853
Goobta qaadashadu waxay dadka mushkiladaha ka badbaday u ogolaanaysa inay buuxiyaan waraqaha loogu ogolaanayo ilaalinta deg dega ah ama ka ashkato qof xumaan kugu haya. Goobtu wax kale oo ay dadka siisaa qorshe amman, hanuunin bulsho iyo jihayn, gargaar sharci ka caawin, dhar, iyo taleefoonada gacanta oo aad ku wici kartid 911. Soo qaado aqoonsi sawirkaagu ku yaalo, qofka xumaaanta kugu haya magaciisa, cinwankiisa, sooshal sekuuritigiisa, tariikhda dhalashadiisa, meesha uu ka shaqeeyo, iyo wixii markhaati ah ee aad haysatid (macaa booliiskii meesha yimi), koobi ah EPO/DVO hadii ay jiraan, iyo ciwaanka aad ku heli kartid macluumaadka maxkamadu kuu soo dirto. Saacaduhu waa Isiin-Jimce 8:00 Subaxnimo Ilaa 12:30 Habeenimo. Ka Ashkatada dambiyadu waxay furan yihii 24-saac todobada maalmood ee wiiga miiska Maxkamada Degmada Ee Dambiyada iyo Taraafikada, waxay iyana ku taalaa dabaqa 1aad ee Golaha cadalada.

Amarka Illalinta Deg-dega Ah (EPOs)

Xafiiska Karaaniga Maxkamada Qoyska
Goobta Cadaalada, 700 W. Jefferson St.; 40202
595-4697 (24 saac maalin walba)
Waxa weeye amar madani ah oo qaadigu bixiyo isagoo u soo jeedinaya in qofka la soo ashkateeyay uu joojiyo cadiskiiska ama inay ka joojiso cadaadiska qofka kale. Hadii aad doonayso inaad EPO xaraysid waa inaad ahaataa:
1) Qof ka mid ah qoyska, naagtii ama ninkii hore, ama qof ka mid ah laba qof oo aan is qabin laakiin wada nool, hore u wada nolaan jiray ama caruur isu leh.
2) Waa inaad 18 jir ahaataa ama qof wayni kula socdaa.
3) Waa inaad keentaa qofka dhibaatada kugu haya cinwaankiisa guriga ama shaqada.
4) Hadii ay suurta gal tahay waa inaad haysaa qofka dhibaatada kugu haya taariikhdiisa dhalashada iyo ama sooshal sekiyuuritigiisa.

Goobta Cadaalada- Miiska Qaybta Maxkamada Degmada Ee Dambiyada Iyo Traafikada

600 W. Jefferson St.; 40202
Maxkamada Degmada Iyo Circuitka
595-4428 ama 595-3064
Waxay bixisaa taageero ah sidaad dacwadaada u xarayn lahayd iyo EPOga. Miiskan ayaad ka helaysaa habeenkii iyo Wiikendhiyada oo qudha (hadii kale eeg Xafiiska Karaaniga Maxkamada Qoyska ama Goobta Cadaadiska Guriga)

Xafiiska Qareenka Degmada Jefferson

600 W. Jefferson St.; 40202
574-6336
www.loukymetro.org/Department/countyattorney
Wuxuu xukumaa kaysaska dambiyada ama kiriminaalka loo yaqaan ee ka dhaca degmada Jefferson, sidoo kale wuxuu metelaa dadka wax yeeladu gaadhay. Qaybaha khusuusiga ah waxa ka mid ah cadaadiska guriga, taageerada caruurta, kaysaska dadka iyagoo daroogaaysan gaadhiyaasha wada DUI, iyo kaysaska dadka waawayn ee lagu xad gudbo.

Waaxda Booliska Ama Sherifka Ee Degmada Jefferson

531 Court Place; 40202
574-5400
Waxay meel marisaa ama qabataa amarka Ilaalinta Deg-dega aha, amarka cadaadiska guriga, digniinta amarka ilaalinta deg-dega ah EPO, digniin xidhitaan inta EPO gu maxkamada ka dhacayo.Waxay bixiyaan macluumaad ku saabsan EPOga iyo sidii uu u dhacayo.Waaxda Booliska Ama Sherifka Ee Degmada Jefferson waxay gacan yare u tahay maxkamada, waxaanay meel marisaa amarada maxkamada sida amarada ku saabsan hubka iyo kaysaska cadaadiska guriga.

Adeega Qareen Ku Hagaajinta Ee Kentucky

600 West Main Street; 40202
583-1801
Looyar ama qareen ku hagaajinta waxa laga dhameeyaa khadka taleefonka, lama ogola inaad iska tagto oo aad tidhaahdo looyar igu hagaajiya. Saacaduhu waa Isniin ilaa khamiis 8:30 Subaxnimo –4:30 Galabnimo. Qofku markuu taleefonka soo diro waxa lagu hagaajiyaa ama lagu qalqaaliyaa looyarada degmooyinka Bullit, Hardin, Jefferson, Meade, Nelson, Oldham, Shelby iyo Spencer ee Gobolka Kentucky iyo degmooyinka Clark, Floyd, Harrison, Scot, iyo Washington ee Gobolka Indiana. Ku hagaajinta qareenada waxa loo eegaa qofku halka uu taleefonka ka soo dirayo ama deganyahay, sharciga ama kayska qofku taageerada uga baahan yahay nooca uu yahay, iyo sida qofku isaga bixin karayo khidmada qareenka. Nusasaacaha ugu horeeya adeegu waa bilaash waliba khidmad aad u hosaysa ayuu bixinayaa qofka loo arko inuu khidmadan jaban u qalmo. Qareeno ku hadlaya luqada Isbaanishka ayaa la helayaa.

Bulshada Ka Caawinta Sharciyada

425 W. Muhammad Ali Blvd.; 40202
584-1254 ama 1-800--292-1862
www.laslou.org
Waxay taageero sharci siisaa qoysaska ka badbaaday cadaadisk. Qofka adeegan doonayaa waa inuu noqdaa qof dhaqaalihiisu liito raacayana meel lo goaamiyay inaan dhaqaalaha qofku dhaafin. Waa inay jirtaa dhacdo ilmo la fara xumeeyay ama ninka oo cadaadis ku haya gabadha dhawaan ama waa inay jirtaa baqdin iyo cabsi joogta ah oo qoku ka qabo qofka kale.

Xarunta Booliiska Louisville Iyo Agagaarkeeda

Baahida deg-dega ah: 911
Caawimooyinka aan deg-dega ahayn: 574-7111
Qaybta Cadadiska Guriga/ Qaybta Dambiyada Galmada: 574-7672
http://lmpdky.org
LMPD waxay soo diraysaa qof booliis ah meesha qofka ashkatada qabaa joogaa, waxaanuu askarigaasi ka caawin doonaa siday/siduu u dhamayn lahaa arjiga ashkatada, hadii qofku dhakhtar u baahan yahayna wuu ka caawinyaa, meel uu qofku u hoydo iyo adeegyo ku saabsan meelaha qofku seexan karo, dhar ka heli karo, maxkamada iyo hanuunin kaleba. Askarigu wuxuu qaadayaa wixii talaaba sharci ah ee mesha ku haboon markaas, taageerana wuxuu ku siinayaa siduu qofku u heli laa amarka Ilaalinta deg-dega ah (EPO) iyo digniin xidhitaan hadii markaa loo baahanyahay. Askarta shaqdoodu tahay inay baadhaan kaysaska cadaadiska guriga ayaa baadhayaa wixii xad gudub iyo aflagaado ah kuna taageeraysa qofka falalkaa ka soo badbaaday markuu maxkamada tago iyo EPOga.

Adeega Intaan Maxkamada La Isla Gaadhin

574-8477
Waxay sii sheegtaa qiimaha damaanada ee kaysaska qaar.

Ishaafalataynta Iyo Damaanada ka

Waxay bixisaa cinwaank ugu dambeeyay ee qofka waxyeelada gaystay waxaanay xafidaan hadii uu qofka wax yeelada loo gaystay dalbado. Waxa laga yaabaa in ay ilaalo gaar ah ku siiso ayna la socoto arimahaaga, wixii xad gudub ah ee qofka dambiilaha ahi gaystana ay qorto.

Qaybta Kaalmaynta Qofka Wax Yeeladu Gaadhay (Xafiiska Qareenka Guud)

1024 Capital Centar Drive, Qolka 200; Frankfort, Kentucky, 40601
1-800-372-2551
waxay bixisaa macluumad ku saabsan sharciga iyo hanuuninay siiyaan dadka wax yeelada ka soo badbaaday iyo kuwa cadaadiska guriga ka soo badbaaday.

Goobta Deriska Ama Jiiraanka

Waxay bixisaa baadhitaan, iyo adeegyo bulshada ah oo ay u qabato hay'ado badan oo hab isticmaal wanaagsan, iyaga oo xooga saaraya inay dhimaan wax ala wixii cadaadis qoys ee hore u jiray, korna u qaadaan xaalada nolosha guud ee qoys kasta oo ay Goobta derisku la shaqayso.

www.neighborhoodplace.org

Goobta Deriska Ama Jiiraanka Ee 810 Barret Ave

810 Barret Ave., Qolka 200; 40204
574-6421
http://www.loukymetro.org/Department/HumanServices/Selfsufficiency.asp
Waxay bixisaa adeegyo deg dega ah oo ay ka mid yihiin taageero dhaqaale, dawooyin, hanuunin iyo u jihayn melo badan dadka (Daroogo ama khamriga sida xun u isticmaala, mushkiladaha dad la dhaqanka iyo edaabta, cadadiska guriga, shaqooyinka, iyo dadka maskaxda ka jiran)

Goobta Deriska Ama Jiiraanka Ee Biriijka Rajada

Waxay bixisaa taageero dhaqaale oo deg-deg ah, dhex-dexaadin qoysaska, adeeg caafimaad, talaal, barnaamij nafaqo oo la siiyo WIC, hanuunin iyo dhex gal, kalaasyo kombuyuutar ah, iyo barnaamij ku baraya isku filnaanshaha nolosha.

Meelaha aad adeegan ka helayso:
-Algonquin, 1411 Algonquin parkway; 40210; 634-6050
Adeegyada: ka caawin shaqooyinkka, barnaamij ah xukuumada guryaha ee Louisville, kalaasyo GED ah, dukaan alaabta caruurta haya, kalaasyo waalidnimada iyo qorshaynta qoyska ah.
-L&N Building, 908 West Broadway, 40203; 595-4575
Adeegyada: Baadhitaan ay u qabtaan KTPA, Medicaid iyo waraaqaha raashinka lagu gato.

Goobta Deriska Ee Cane Run

3410 Lees Lane; 40216
485-6810
Taageero dhaqaale oo deg-deg ah, dhakhtar daawayn, baadhitaan iyo ku hagaajin meelo badan (khamriga iyo daroogada sida xun loo isticmaalo, mushkiladaha tacliinta iyo edaabta, cadaadiska guriga, shaqooyinka, iyo waxyaabaha la xidhiidha dadka maskaxda ka jiran), Baadhitaanka KTPA, daawayn, iyo waraaqaha raashinka lagu iibsado, Barnaamij abaaraya qiyaasida (waxay bixiyaan taageero ay siiyaan dadka daroogada iyo

khamriga sida xun u isticmaala, dadka maskaxda wax uga dhiman yihiin, dadka cadaadiska gurigu haysto, iyo dadka wax barashadu ku adagtahay), waxa kale oo ay bixisaa xanaano caruurta ah oo ay bulshadu isku duba rido.

Goobta Koowaad Ee Deriska

1503 Rangeland Road; 40219
962-3160
Taageero dhaqaale oo deg-deg ah, dhakhtar daawayn, baadhitaan iyo ku hagaajin meelo badan (khamriga iyo daroogada sida xun loo isticmaalo, mushkiladaha tacliinta iyo edaabta, cadaadiska guriga, shaqooyinka, iyo waxyaabaha la xidhiidha dadka maskaxda ka jiran), Baadhitaanka KTPA, daawayn, iyo waraaqaha raashinka lagu iibsado, Barnaamijka nafaqada ee WIC, Barnaaka dhiiri galinta dhalinyarada (T.Y.P.E), iyo barnaamijka kursiga dhalaanka.

Satelaytyada: -Library High School, 3307 E. Indian Trail, 40213; 962-5660

-Newburg Health Clinic, 4810 Exeter Ave., 40213; 458-0778

Goobta Deriska Ee Waqooyi Galbeed – Iskuulka Sare Ee Shawnee

4018 West Market Street; 40272
772-4540
Taageero dhaqaale oo deg-deg ah, dhakhtar daawayn, baadhitaan iyo ku hagaajin meelo badan (khamriga iyo daroogada sida xun loo isticmaalo, mushkiladaha tacliinta iyo edaabta, cadaadiska guriga, shaqooyinka, iyo waxyaabaha la xidhiidha dadka maskaxda ka jiran), Baadhitaanka KTPA, daawayn, iyo waraaqaha raashinka lagu iibsado, ku hagaajin meelaha taageerada, qof intifaac u ah hablaha yar yar ee uurka qaada, maamulid kaysaska qoyska, iyo maamulid kaysaska waalidiinta.

Goobta Derisk Ee Koonfurta Dhexe

4255 Hazelwood Place; 40215
485-7130
Taageero dhaqaale oo deg-deg ah, maamulid kaysaska qoyska, macluumaad iyo ku hajaajin meelaha haboon, taageero gacan qabasho ah oo la siiyo waalidiinta ilmahoodii ugu horeeyay imika dhalay, waraaqaha raashinka lahu iibsado, kaadh dhakhtar/KCHIP, barnaamijka nafaqada ee WIC, JCPS dadka luqadooda koowaad aanay Ingiriisiga ahayn, maamul kaysaska dadka daroogada iyo khamriga sida xun u isticmaala, shaqooyin/tababaro iyo hanuunin, dukaan alaabta caruurta ah, KTAP.

Goobta Deriska Ee Koonfurta Jefferson- Fairdale

1000 Neighborhood Palce; 40118
363-1424

Taageero dhaqaale oo deg-deg ah, dhakhtar daawayn, baadhitaan iyo ku hagaajin meelo badan (khamriga iyo daroogada sida xun loo isticmaalo, mushkiladaha tacliinta iyo edaabta, cadaadiska guriga, shaqooyinka, iyo waxyaabaha la xidhiidha dadka maskaxda ka jiran), Baadhitaanka KTPA, daawayn, iyo waraaqaha raashuinka lagu iibsado, Barnaamijka nafaqada ee WIC, maamulid kaysaska qoyska, shaqooyinkana waa lagaa caawinayaa.

Goobta Deriska Ee Koonfurta Jefferson- Valley

10200 Dixie Highway; 40272
995-3000
Taageero dhaqaale oo deg-deg ah, dhakhtar daawayn, baadhitaan iyo ku hagaajin meelo badan (khamriga iyo daroogada sida xun loo isticmaalo, mushkiladaha tacliinta iyo edaabta, cadaadiska guriga, shaqooyinka, iyo waxyaabaha la xidhiidha dadka maskaxda ka jiran), Baadhitaanka KTPA, daawayn, iyo waraaqaha raashinka lagu iibsado, gacan siin waalidiinta ilmahoodii ugu horeeyay imika dhalay.

Goobta Deriska Ee Ujima

3500 Bohne Ave.; 40211
485-6710
Taageero dhaqaale oo deg-deg ah, dhakhtar daawayn, baadhitaan iyo ku hagaajin meelo badan (khamriga iyo daroogada sida xun loo isticmaalo, mushkiladaha tacliinta iyo edaabta, cadaadiska guriga, shaqooyinka, iyo waxyaabaha la xidhiidha dadka maskaxda ka jiran), Baadhitaanka KTPA, daawayn, iyo waraaqaha raashinka lagu iibsado, Barnaamijka nafaqada ee WIC, qoyaska ku jira xiliga kala guurka, casharo iyo macluumaadyo ku saabsan cadaadiska guriga, dhexdhexaadin, iyo daroogada qarsoon.

Kufsashada

Iskaashatada Barnaamijka Waxyeelada Galmada Ee Kentucky

502-226-2704 (Frankfort)
1-800-656-HOPE (RAIN Hotline)
www.kasap.org
Waxay siisaa macluumaad iyo taageero dadka waxyeelada galmadu soo gaadhay iyo macluumaad guud oo ku saabsan dadka ka badbaaday fara xumaynta galmada guudahaan. Waxay dadka ku hagaajisaa goobaha musiibooyinka ee degaanka iyo SANE (Kalkaalisada Baadhitaanka Dadka La Fara Xumeeyay), barnaamijyada xaafadaha.

Barnaamijka Musiibada Kufsashada Goobta Dumarka Iyo Qoysaska

226 West Breckinridge St.; 40203
Laga bilaabo November 15,02004 Cinwaankoodu wuxuu isu bedelayaa 927 E. 2nd St
581-7273
www.thecenteronline.org
Waxay bixisaa taageero 24-saac ah oo ay siiyaan dadka ka badbaaday musiibooyinka kufsiga iyo iyaga oo taageerada u sii wada dadkii hore wax yeeladu u soo gaadhay. Adeegyadan waxa ka mid ah maamulka kaysaska, taageero dhakhtarka iyo maxkamada ah, daawayn shakhsiyaad iyo guruubo ah, iyo guruubo ah waalidiinta iyo dadka ay nolosha wadaagaan ee ka badbaaday waxyeelooyinka.

Dhakhtarka Jaamacada Luoisville

530 S. Jackson St.; 40202
562-3000
www.uoflhealthcare.org
Waxay bixisaa daawayn deg-deg ah, meelo farmasiyo ah o dadka lagu daweeyo, iyo qiyaasid ama fiirin dadka maskaxda wax uga dhiman yihiin, adeegaasoo ay siiyaan qofkasta oo u baahan ama ha iska bixin karo ama yaanuu iska bixin karine. Dad ka tirsan Goobta Dumarka iyo qoyaska ayaa 24-saac diyaar ku ah qolalka emerjensiga si ay u caawiyaan dadka ka soo badbaaday cadaadiska iyo dhaawaca ka soo gaadhay qofkay galmada wadaagayeen. Waxa kale oo ay bixisaa SANE (Kalkaalisada Baadhitaanka Dadka La Fara Xumeeyay) kalkalisooyin, kuwaasoo tababar khaas ah u haysta sida wax looga qabto dadka la kufsaday iyo kuwa wax yeelooyinka galmada la xidhiidhaa soo gaadheen.Turjubaan waa loo helayaa qofkii dalbada.

Goobta Dumarka Ee Jaamacada Louisville

852-8976
Waxay bixisaa macluumaadyo iyo intifaacyo ku saabsan kufsiga iyo wax yeelooyinka galmada la xidhiidha.

Muwaadiniinta Waayekla Ah

Adeega Ilaalinta Dadka Waawayn
908 Broadway; 40203
595-4803
Ka soo sheeg lambarka 24-saac ah (1-800-752-2600) dhamaan kaysaska ku saabsan kufsashada iyo fara xumaynta. Qof ka socda waaxda taageerada ayaa baadhaya bixinayana amar Ilaalo iyo taageero dadka ka soo badbaaday fara xumaynta.

Goobta Nolosha Banaan
981 S. Third St.; Qolka 102; 40203
589-6620
589-3980, TDD
www.calky.org/lservices.html
Goobtani waa urur ah nooca loo yaqaan no-for-profit ama kuwa aan macaashka raadin, waxaana meesha wada oo ka shaqeeya dadka laxaadkoodu aanu dhmayn. Xafiiska wuxuu leeyahay meelo dadka curyaamiinta ah ee gaadhi-curyaanka wataa ay isticmaalaan, waxaanu bixiyaa barnaamijyadan: Barnaaj daawayn ah, Taageego xaga guryaha ah, dadka oo ay u tababaraan sida uu u noolaan lahaa isaga oo aan qofku cid kale u baahnayn, hanuunin, meelo gaadhi curyaan ku maro oo loo dhisho, barnaamijyo shaqo, iyo taageero xaga farsamada ah.

Qaybta Dadka Waayeelka Ah Dambiyada laga Galay
Hay'ada Booliiska Louisville Iyo Agagaarkeeda
436 S. 7th Street; 40203
574-2278
http://www.impdky.org
Waxay baadhaysaa dambiyada laga galay dadka waayeelka ah sababta dambiga looga galayna tahay da'dooda. Dambiyadaas waxa ka mid ah dhicitaank la dhaco dadka waayeelka ah, waxa kale oo ay la shaqaysaa Amarka Ilaalinta ee dadka waawayn.

Shirkada Adega Dadka Waawayn
411 east Muhammad Ali Blvd.; 40202
587-8673
www.elderservecing.org
Waxay bixisaa koox si deg-deg ah ugu gurmada musiibooyinka la soo kulma dadka waawayn, taageero ay siiyaan qofka dambiga laga galay, taageero shakhsiyaad iyo guruubo, dadka waayeelka ah oo ay u wehel yeelaan, xanaano waayeelka ah, barnaamij nafaqo iyo taageero la siiyo dadka waayeelka xanaaneeya.

Iskaashiga Hoyga Dadka Waayeelka Ah

2911 S. Fourth Street; 40208
637-9786
Waxay bixsaa hoy ku meel gaadh ah oo ay siiso dadka waayeelka ah ee da'doodu ka wayntahay 65 jir ee la inkiray ama la cadaadiyo ama la fara xumeeyay.

Adeega Shirkada Xanaanada Ilaalada

211 West Breckinridge St.; 40203
585-9949
Waxay bixisaa maamulo dhaqaale ay ka mid yihiin adeegyada ka bixin biilka iyo ilaalin muwaadiniinta aan kari karin inay dhaqaalahooda maamulaan oo la dhaco ama in ay hoy la'aani qabsato looga baqanayo.

Xafiiska Qareenka Degmada Jefferson

600 W. Cedar St.; 40202
www.loukymetro.org/Department/countyattorney
Waxay qaadaaa kaysaska dambiyada ah ee ka dhaca Degmada Jefferson, waxaanay metelaan qofka dambiga laga galay. Kooxda sare ee qareenka Degmada (C.A.S.T) waxay ku takhasuseen sida loo baadho dambiyada laga galo dadka waayeelka ah.

KIPDA-Kooxda Xanaanada Mudada Dheer Ah

2911 S. Fourth Street; 40208
637-9786
www.kipda.org
Waxay bixisaa adeegyo sharciga ku saabsan iyo baadhitaano ay u qabato dadka waayeelka ah ee waxyeelada loo gaystay.

Xafiiska Dadka Gaboobay Iyo Dadka Curyaamiinta Ah

Adeega Camaliyada Is-Caawinta Bini Aadmiga Ee Louisville iyo Agagarkeeda
Goobta Dawlada Ee Reer Magaalka
810 Barret Ave., Qolka 200; 40204
574-6421
http://www.loukymetro.org/Department/HumanServices/Selfsufficiency.asp
Waxay bixisaa adeegyo, macluumaadyo iyo intifaac ay siiso dadka gaboobay iyo dadka curyaamiinta ah ee Louisville iyo agagaarkeeda. Waxay bixisaa adeegyo iyo macluumaadyo ku saabsan meelaha dadkaasi caawimo ka heli karaan, waxa kale oo ay qaybisaa macluumadka adeegyada ka jira agagaarka ee u banaan dadka gaboobay iyo kuwa curyaamiinta ah, waxa kale oo ay bixisaa tacliin ay siiso kooxo caawiya dadka waayeelka ah iyo kuwa curyaamiinta ah.

Mashruuca Bulshada Ee Shaqagaynta Dadka Waayeelka Ah

600 West Cedar Street; 40202
584-0309
Waxay Bixisaa tababar-shaqo iyo taageero shaqagayn oo ay u qabato dadka dhaqaalahoodu aadka u hooseeyo ee ka wayn 55 sano.

Adeegyada Gargaarka Ah

Hay'ada Caafimaadka Iyo U Adeega Qoyska/ Hay'ada Adeegyada Gargaarka Ah (DSS)

908 W. Broadway; 40203 (L&N Building)
595-4008
Waxay bixisaa adeegyo taageero ah iyo baadhitaan oo ay siiso qoysaska la kulmay cadaadiska kaga yimaada qofka nolosha la wadagayeen ama caruuraha cadaadiska lagu hayo.
Adeega Ilaalinta dadka waawayn 595-4803
Khadka Adeega Ilaalinta Caruurta la cadaadiyo 595-4550
(24-saac khadka 1-800-752-6200)

Adeega Bini Aadmiga Ee Louisville iyo Agagarkeeda

810 Barret Ave., Qolka 200; 40204
574-8000
www.loukymetro.org/Department/HumanServices
Waxay bixisaa caawimooyin ay ka mid yihiin adeegyada dhaqaale ee deg-dega ah iyo adeegyo taageero ah oo ay siiyaan qoysaska iyo caruuraha. Waxay bixisaa macluumaadyo iyo hogaamin ku saabsan intifaacyo badan oo kala duduwan, oo ay ku jirto Goobta Derisku.

Adeega Bini aadmiga Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda: Adega Caawinta iyo Falanqaynta Qoyska

810 Barret Ave; 40204
547-8000
http://www.loukymetro.org/Department/HumanServices/familyassessment.asp

Adeega Macluumaadka Iyo Ku Hagaajinta

Waa meesha ugu horaysa ee lala xidhiidho marka aad doonayso adeegyada goobta qoysaska iyo goobta deriska ee ka jira Louisville iyo agagaarkeeda. Adeegyo guryaha ah oo ay ku jiraan taageerada dhaqaale ee deg-dega ah iyo intifaacyada ee habka guriyaynta. Fadlan hadii aad adeegyadan doonays soo wac si laguugu sameeyo baadhitaan inaad adeegyadan dhaqaale u qalanto iyo in kale.

Goobta Deriska Ama Jiiraanka

Fiiri qaybta "Goobta Deriska" hadii aad meel gaar ah u baahantahay.

www.neighborhoodpl.org
Waxay bixisaa baadhitaan.Waxa kale oo ay bixisaa badhitaan, meelaha la gaadhayo, iyo gargaaro fara badan oo wanaagsan, iyagoo muhimada siinaya inay dhimaan wax ala wixii cadadis guri aha ee haystay qofka, kordhiyaana dhamaan nolosha qoys walba oo ka tirsan Goobta Deriska.

Habka Iskaashiga Ee Metro

334 E. Broadway; 40204
583-2821
www.metrounitedway.org
Waxay bixisaa adeegyo ay siiso dad badan oo bulshada ka mid ah. Adeegyadaas waxa ka mid ah xanaanada caruurta iyo ka hortaga waxyeelaynta caruurta yar-yar, hanuunin shakhsiyaadka iyo guruubada ah, taageero dhaqaale oo deg-deg ah oo la siiyo qoysaska khatarta u ah inay bilaa guryo noqdaan, hanuunin iyo maaweelin dadka waayeelka ah, iyo taageero nolol xor ah oo loogu deeqo waayeelka iyo dadka laxaadka l'a.

Shirkada Adeega Todobada Degmo

101 W. Muhamed Ali Blvd.; 40202
589-1100 (Balanta oo qudha) 589-4313 (Macluumaadka)
www.sevencounties.org
Waxay bixisaa caawimooyin caafimaadyada maskaxda ah, daroogada iyo khamriga sida xun loo isticmaalo iyo cadaadiska guriga, cadaadiska qoysaska iyo koritaanka dadka bilaa laxaadka ah. Adeegyada waxa ka mid ah dhexgalka iyo hanuuninta deg-dega ah, ku hagaajin qofka meel u ka heli karo hanuunin iyo waxyaabaha kale ee qofka lagu daweeyo, hanuunin qoys, ka hortaga daroogada iyo khamriga sida xun loo isticmaalo. Luqad kasta waad helaysaa adigoo isticmaalaya khadka luqadaha.

Si Xun U Isticmaalka Maandooriyaha

Al-Anon/Alateen
4400 Bishop Lane Qolka 104; 40218
458-1234
www.al-anon.alateen.org
Waa barnaamij bilaash ah oo dadka aalkoliistayaasha ahi ay ku wadaagaan rajooyinkooda, awoodooda iyo jacaylkaba. Soo wac hadii aad doonayso inaad ogaato meelaha lagu kulmo.

Dadka Aan La Aqoonin Ee Aalkoliistayaasha Ah
305 W. Broadway, Qolka 310; 40202
582-1849
www.aa.org
Waxay bixisaa macluumaad kulan ama shir guruubyo ah oo ay siiso dadka doonayaa inay joojiyaan khamri cabista. Waxaanay la soconaysaa xaalada dadka joojiya khamri cabista. Waxa ay bixisaa jawaabo ku saabsan khamri joojinta 24-saac.

Barnaamijka Ku Tiirsanaanta Kiimikada Ee Dhakhtarka Baptiska Bari
4000 Kresge Way; 40207
896-7105
Khadka caawimada 24-saac 1-800-467-8183
www.baptisteast.com/030400.cfm
Dhakhtarkani wuxuu bixiyaa barnaamijyo qiyaaso iyo ku tiirsanaanta kiimikada ah kuwaasoo dhakhtarka gudahiisa iyo dibadiisaba ay ka qabtaan ama noqon kara in mudo gaaban lagu jiifiyo dhakhtarka laftiisa.Waxa kale oo ay bixisaa barnaamij xanaano sii wadin ah. Tacliinta dadka kiimikada ku tiirsani waxay bixisaa taageero ay siiso qoysaska iyo dadka dhibaataysan. Dumarka uurka leh waa la aqbalaa laakiin dibada ayaa lagu daweeyaa. Lacagta khidmada ahi waxay ku xidhan tahay mudada qofku barnaamijka isticmaalo iyo shaqada loo qabanayaa intay leegtahay.

Golaha Nabadgalyada ee Caritas
2020 Newburg Road; 40205
Khadka caawimada 24-saac 451-1333 ama 1-800-451-3637
www.caritas.com
Wuxuu dhakhtarkani bixiyaa hanuunin ku saabsan si xun u isticmaalka kiimikada iyo daroogada, adeegyadaas oo ka dhaca dhakhtarka gudahiisa, debadiisa iyo qaar dhakhtarka gudahiisa la dhigoba.Waxa kale oo ay bixisaa barnaamijyo khaas ah oo loogu tala galay dadka ka soo doogay daroogo isticmaalka. Barnaamijyo khaas ah ayaa la siiyaa dhalinyarada da'doodu u dhaxayso 12-18 ee sida xun u isticmaala daroogooyinka.

Guriga Xoriyada- Iskaa Wax U Qabsada Maraykanka

1436 South Shelby Street #2; 40217
634-0082
Waa meel lagu daweeyo ama lagu xanaaneeyo dumarka uurka leh ee daroogada iyo khamriga isticmaala iyo dumarka caruuraha yar-yar haysta.

Goobta Bogsashada

Xafiiska Wayn:
1020 West Market Street; 40202
Goobta Dumarka:
1607 West Broadway; 40203
www.thehealingplace.org
Waxay bixisaa adeegyo badan oo kala duduwan ay siiso dadka hoy la'aantu hayso, oo ay ka mid yihii adeegyada aan la xidhiidhin daawada, barnaamij loogu tala galay dadka ka soo doogay dhibaatooyinkaas. Waxa kale oo ay bixisaa barnaamijyo ay isgu keenaan dadka dhibaatooyinka ka soo doogay iyo qoysaskooda iyo caruurtooda.

Goobta Intifaaca Ka Hor Taga

332 West Broadway, Qolka 1213; 40202
587-8888
www.interventioninfo.org
Waxay bixisaa macluumaadyo iyo ku hagaajin ay siiso qoysaska iyo saaxiibadooda sida xun daroogada u isticmaala (ama dadka waxyaabaha kale ee maandooriyaha ah isticmaala) si ay u helaan ka hortag hagaagsan kuna xidhaan dad khibrad u leh ka hortaga dhibaatooyinkaas.

Goobta lagu Daweeyo Dadka Daroogada iyo Khamrigu Dishooday Ee Jefferson (JADAC)

600 S. Preston; 40202
586-3951
Wuxuu xafiiskani bixiyaa barnaamijyo khuseeya dadka daroogada iyo khamriga sida xun u isticmaala. Waxa kale oo ay bixiyaan mashruucyo dhakhtarka gudahiisa ay ku daweeyaan dumarka uurka leh iyo kuwa umula ee daroogada isticmaala. Adeegyada kale ee JADAC bixiso waxa ka mid ah qofka oo laga sifeeyo daroogada, iyo in la xanaaneeyo inta uu ka soo bogsanayo, adeeg wacan marka qofku dhakhtarka ka baxo ka dib, barnaamijyo tababar galbihii iyo iyo maalintii, barnaamijyo khuseeya dadka iyaga oo sarkhaansan gaadhiyaasha kaxeeya DUI, iyo barnaamijyo tacliin ah oo loogu tala galay qoysaska iyo dadka ay ka masuulka yihiin, iyo caruurta yar-yar ee dadka daroogada isticmaalaan dhaleen.. Adeegyo khaas ah ayaa loogu tala galay dumarka uurka leh, iyo kuwa caruuraha yar-yar wata. Khidmadu ma badna, caymiskana way aqbalayaan.

Guriga Maude Booth

1131 South 1st Street; 40203
582-0904
Waxay adeeg siisaa dumarka caruurta yar yar haysta ee daroogada iyo khamriga isticmaala. Waxay bixiyaan tacliin, hanuunin, waxa kale oo ay bixisaa maamulid kaysaska, tacliimo ku saabsan balwada iyo cudurka HIV/AIDS ka, gargaar ku saabsan waalidnimada iyo xirfadaha nolosha, adeegyada xanaanada caruurta iyo sii wadashada caafimaadka.

Goobta Deriska ama Jiiraanka

Fiiri qaybta "Goobta Deriska" meelaha ay ku taalo.
www.neighborhoodpl.org
Waxay bixisaa adeegyo ka hortag wakhti gaaban ah oo ay siiso qoyasaska iyo shakhsiyaadka daroogada iyo kiimikada sida xun u isticmaala. Adeegyo dhexdhexaadin ah ayaa goobo fara laga bixiyaa.

Shirkada Adeega Todbada Degmo

101 W. Muhamed Ali Blvd.; 40202
24-saac khadka macluumaadka iyo musiibooyinka- 589-4313, 589-4259 (TDD)
www.sevencounties.org
Waxay bixisaa barnaamijyo badan oo lagaga hor tago daroogada iyo khamriga sida xun loo isticmaalo.Qofku wuxuu dooran karaa in dhakhtarka dhexdiisa lagu daweeyo iyo gurigiisa ama meel dhakhtarka gudihiisa aan ahayn in lagu daweeyo. Waxa kale oo ay bixisaa barnaamij loogu tala galay dadka ka soo doogay si xun u isticmaalista daroogooyinka iyo maandooriyayaasha kale oo ay ku bixiyaan goobta Light House la yidhaahdo. Barnaamijyo badan oo kuwan ka mid ah ayay JADAC bixisaa. Luqad kasta waa laga helayaa khadka luqadaha.

Goobta Soo Doogista/Bogsashada Dumarka Ee St. Jude

Bulshada St. Vincent de Paul
1015-C S. Preston St.; 40203
584-2480
Waxay bixisaa 30- sariirood oo ay ugu tala gashay dumarka ka soo doogaya ama ka soo bogsanaya isticmaalka Daaroogada iyo Khamriga

Hay'ada U Adeega Bini Aadmiga Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda kuma takoorto kamana cunsuriyadaso shaqada ama taageerada sababaha la xidhiidha curyaannimo , rag iyo dumar, midab, sinjiyad, diin, da', meesha uu qofku u dhashay awgeed, ama lab iyo dhedig ka qofku yahay.

Jerry E. Abraha
Duqa magaalada

Gudida Louisville iyo Agagaarkeeda

Tina Lentz, Agaasimaha
Xafiiska Dumarka
Adeega Bini Aadmiga Ee Louisville Iyo Agagaarkeeda
Taleefon: 574-5360
Fax: 574-6888
Email: ofw@louisvilleky.gov
Website**: www.louisvilleky.gov/ofw**